# SOMALIA

## Warbixin Kooban

Soomaaliya waxa ay u kala googo'day  gobolo oo gebi ahaan ama qeybo ka mid ah goboladaas ay hogaamiyaan maamulo kala duwan oo ay ka mid yihiin:   Dawladda Ku Meel Gaarka Ah (TFG) ee Muqdisho, Jamhuuriyadda goonida isu taagtay ee Soomaaliland ee waqooyi galbeed iyo is maamul goboleedka Puntland ee waqooyi bari iyo maamul goboleedka gobolada dhexe ee Galmuduug.  Dawladda ku meel gaar ah waxaa la abuuray 2004tii iyadoo loo xilsaaray in ay muddo shan sano ah ku dhisto hay'adaha dawladda oo joogto ah lana qabto doorasho qaran.  Bishii Janaayo 2009kii barlamaanka ku meel gaarka ah (TFP) oo ka kooban 550 xubnood oo lagu abuuray shirkii dhexdhexaadinta ee lagu qabtay Jabuuti (DPP) shirkaas oo helay taageero caalami ah kaas oo lagu soo doortay Sheekh Shariif Sheekh Axmed inuu madaxweyne ka noqdo dawladda ku meel gaar ah.  Bishii Febraayo 3deedii, TFP waxaa go'aan aan loo dhameyn lagu kordhiyey sadex sano oo dheeraad ah.

9kii Juun ka dib markii muddo lix bilood ah uu marun ka dhex taagnaaa Baarlamanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka iyo dawladda ku meel gaarka ah (oo labadooda oo wadajira loogu yeero hay'adaha dawlada dhexe ee ku meel gaarka ah TFI) oo ay soo dhamaanayso xiligii ku meel gaarka ahaa, madaxweynaha iyo afhayeenka barlamaanka Sharif Sheekh Xasan, ayaa la gaaray heshiiskii Kambaala.   Heshiiskaas waxaa mudada ku meel gaarka ah la gaarsiiyey ilaa 20ka Agoosto 2012ka iyadoo lagu cadeeyay in doorashada madaxweynaha iyo afhayeenka la qabto xillgaas ka hor.   6dii Siteembar TFI iyo wadamada iyo hay'daha siyaasadda ee gobolka ee daneeya arrimaha Soomaaliya waxa ay ansixiyeen barnaamij lagu soo afjarayo xilliga ku meel gaarka ah taasoo qodobkiisa ugu muhiimsan yahay in la soo dhameystiro ka hor bisha Agoosto ee 2012.  13kii Diseembar xubno ka tirsan baarlamaanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka ayaa u codeeyay cod kalsoonida lagaga qaadayo afhayeenka baarlamaanka Sharif Xasan.    Dawladda ku meel gaarka ah, Ururku Midowga Afrika, Hay'ada u Dhaxeysa ee Horumarinta (IGAD), iyo afhayeenka baarlamaanka Sharif Hassan oo codka kalsoonida looga qaadayo ku tilmaameen mid ka soo horjeeda heshiiskii Kambaala waxayna su'aalo iska weydiiyeen in loo maray wadadii sharciga aheyd. Dhamaadkii sanadka Sharifka Hassan waxa uu ku nagaaday jagadii uu hayey ee afhayeenka baarlamaanka.

Xadgudubyada la xiriira dagaalka, oo ay ka mid yihiin dilka, qaxa, iyo xadidaadda gargaarka bini'aadminimo ayaa sii socday oo dhibaato balaaran u geystay bulshada rayidka ah.  Sida laga soo xigtay Qaramada Midoobay, waxaa jirey 1.36 milyan

qof oo ah dadka soo barakacay ee ku sugan waddanka gudihiisa iyo 955,000 qof oo qaxooti ku noqday wadamada deriska ah, oo inta badan ka dhalatay dagaalka, gaajada, iyo xaalufka dhulka. Qiyaastii 300,000 oo qaxooti Soomaali ah ayaa soo gaaray Kenya, Itoobiya, Jabuuti iyo Yemen sanadkan gudihiisa isku xukunka sharciga waxa uu ahaa mid ahaan gebi ahaanba jirin. Al-Shabaab ayaa gacanta ku haya inta badan gobolada dhexe iyo koonfurta, halkaasoo uu ka dhacay xadgudub xuquuqda aadanaha oo ay ka mid tahay dil, jir dil, xayiraad loo geystay gargaarka bini'aadminimada iyo xoog ku qaadasho. 6dii Agoosto waxa ay dib uga gurteen goobihii ay ka heysteen Muqdisho, laakiin bilihii xigay waxa ay sii wadeen weerarkii ay ku hayeen magaalada.

Magaalada Muqdisho, maamulka goboleedka Puntland, iyo Somaliland waxaa ka dhacay xadgudub badan oo geystay xuquuqda aadanaha oo ay ka mid yihiin dilal ay geysteen ciidamada nabadgelyada, maleeshiyooyinka, Al-Shabaab, iyo rag hubeysan oo aan la garaneyn; xayiraad lagu soo rogay saxaafadda, oo ay ka mid yihiin dil loo geysto shaqalaha warbaahinta iyo rabshado loo geysto dumarka iyo gabdhaha oo ay ka mid yihiin kufsiga iyo gudniinka gabdhaha.

Xadgudubyada kale ee loo geystay xuquuqda aadanaha waxaa ka mid ah xaalado khatar gelinaya nolosha maxaabiista oo ka jirta xabsiyada, xarig aan sabab lahayn iyo xabsi ku heyn; maxkamad aan cadaalad ku dhisneyn; xoriyadda isu uruka iyo hadalka oo la xadido; musuqmaasuq; xadgudub loo geysto xuquuqda ay muwaadiniintu u leeyihiin in ay ku bedeli karaan xukuumadda, xadgudub loo geysto caruurta, heyb sooc ku dhisan qabyaalad iyo dadka diin ahaan laga tiro badan yahay; xuquuqda shaqaalaha; shaqaalaha oo xoog loogu shaqeysto; iyo caruurta laga dhigto shaqaalaha. Al-Shabaab waxa ay geysteen xadgudubyo liddi ku ah xuquuqda aadanaha oo ay ka mid yihiin dil; dad la la'yahay; ciqaab aan caadi aheyn oo arxan daro ah; kufsi; xadidaad xuquuqda madaniga ah iyo xoriyadda dhaqdhaqaaqa; xayiraad lagu soo rogo hay'adaha samafalka (NGOs) iyo kuwa gargaarka bini'aadminimo; iyo caruurta oo askarta la qoro. Kooxaha hubeysan oo ay ka mid yihiin kuwa ay dawladda ku meel gaarka ah taageerto ayaa sidoo kale la yimaada xadgudubyada. Burcad badeedda ayaa geysta afduub iyo dil.

dawladda ku meel gaarka ah, Puntland iyo Somaliland guud ahaan ma aaney qaadin wax talaabo ah oo ay ku ciqaabayaan ama sharciga lagu hor keeno saraakiisha geysta xadgudubyada iyo in aan sharciga lagu qaadin waxa ay noqotay wax iska caadi ah.

## Qeybta 1aad Ixtiraamka Sharafta Qofka oo ay ka mid tahay Xoriyadda:

### a. Qofka oo xoriyadiisa loo soo celiyo ama aan noloshiisa khatar la gelin.

Dawladda ku meel gaarka ah iyo kooxaha raacsan, ciidamada Puntland, Somaliland iyo Al-Shabaab iyo burcad badeeduba waxa ay geysteen dil aan loo aabo yeelin. Waxaa kale oo sii socday dilka loo geysanayo bulshada rayidka ah iyo shaqaalaha gargaarka bini'aadminimo (arag qeybta 1.g).

Ciidamada dawladda ku meel gaarka ah, maleeshiyada raacsan iyo dad ku labisan dharka ciidamada ayaa dilay dad rayid ah, oo ay ka mid yihiin shaqaalaha warbaahinta (arag 2.a), dad banaanbax sameynayey (arag 2.b) iyo dadka soo bara kacay iyo kuwo kale.

Tusaaale ahaan, 15kii Febraayo xubno raacsan duqii hore ee Magaalada Muqdisho "Maxamed Dheere" maleeshiyada raacsan dawladda ku meel gaarka ahayaa dilay afar qof iyagoo dhaawacay 12 qof oo kale ka dib markii ay rasaas ku fureen isu soo bax si nabadgelyo u dhacay oo ay sameeyeen maamulka Banaadir (Muqdisho). 16kii Febraayo ka dib markii cadaadis kaga yimid bulshada caalamiga ah dawladda ku meel gaarka ah iyo xoogaga Ciidamada Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) waxa ay xireen Dheere iyo afar xubnood oo ka tirsan maleeshiyada raacsan oo lagu tuhunsan yahay in ay qaadeen weerarka. 27kii Maarso maxkamad ayaa sii deysay Dheere ka dib markii lagu caddeyn waayey dambiga. Afartii qof ee kale waa la sii hayey iyada oo aan wax dambi ah lagu soo oogin ilaa dhamaadkii sanadka.

Ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ayaa ku dilay dad goob cuntada lagu qeybinayey. Tusaaale ahaan, 5tii Agoosto ciidan raacsan dawladda ku meel gaarka ah ayaa bililiqeystay goob cuntada lagu qeybinayey ee xerada dadka soo bara kacay ee Badbaado, halkaas oo ay ku dhinteen dadka soo bara kacay ee safka ugu jiray qeybinta cuntada. Ka dib markii uu shilka dhacay waxa ay dawladda ku meel gaarka ah samey gudiyada hawlgalka ee gaarka ah si ay u badbaadiyaan dadka soo bara kacay iyo shaqaalaha gargaarka bini'aadminimo, hase yeeshee, gudiyada hawlgalku si haboon uma hawlgelin.

Eedeysanayaasha la horkeenay maxkamadaha ciidamada gaashaandhigga ee dawladda ku meel gaarka ah kaasoo mararka qaarkood lagu qaado eedeysanayaal bulshada rayidka ah, kuwaas oo aan loo sameyn wax difaac ah ama fursad ay racfaan kaga qaadan karaan (arag sidoo kale qeybta 1.e.). Kuwa lagu xukumay dhimashada waxaa lagu dilay saacado gudahood ka dib go'aanka maxkamadda.

Dawladda ku meel gaarka ah waxa ay sheegtay in ciqabtaasi ay tahay mid aad u daran oo loo baahnaa in markiiba la fuliyo xukunka maxkamadda si "fariin adag" loogu diro kuwa dhaqanka ka dhigtan in aan sharciga lagu qaadin. 16kii Maarso dawladda ku meel gaarka ah waxa ay maxkamaddu amartay fulinta dilka laba askari oo lagu helay dambi ka dib markii ay dileen askar la socotay. Labadaba waxaa lagu dilay 10 cisho ka dib.

Oktoobar 30keedii ciidamada nabadgelyada ee Somaliland waxa ay rasaas ku fureen 50 qof iaygoo isku dayey in ay xoog uga saaraan guryo ku yaal magaalada Hargeysa meel u dhow isbitaalka guud, kuwaas oo lagu dilay Jaamacadda Hargeysa iyada oo sadex kale lagu dhaawacmay. Dadku waxa ay deganaayeen dhismayaasha dawladda in ka badan 20 sano kuwaasoo dawladda ay Soomaaliland in ay u balanqaaday in ay dhul kale siiyaan lagana siinayo magdhaw lacagtii kaga baxday dib u dhiska dhismayaashaas.

Maamulka Puntland waxa ay xoog u adeegsadeen amaan daro ka dhacday taasoo keentay dhimasho dhawr qof. 1-2dii Siteembar dagaal ayaa dilaacay degaanka Garsoor ee waqooyiga Gaalkacyo kaas oo dhexmaray ciidamada Puntland iyo dad taageersan qabiilada degaanka ka dib markii ay isku dayeen in ay xiraan dad taageersan Al-Shabaab. Dagaalkaas ka dhacay waqooyiga iyo koonfurta Gaalkacyo halkaas oo ciidamada Puntland ay xoog ku galeen iyaga oo aan ogolaasho ka heysan maamul goboleedka Galmudug.

Al-Shabaab waxa ay geysteen dilal aan loo aabo yeelin oo ah dilal siyaasad ku dhisan oo ay ka mid yihiin saraakiisha Puntland. 20kii Siteembar qof hubeysan oo aan la garaneyn ayaa toogasho ku dilay xildhibaan ka tirsan baarlamaanka Cabdiwali Muuse Shire "Dhuuke" isaga oo gurigiisa u socda.

Weerarada Al-Shabaab ee shaqaalaha gargaarka, shaqaalaha ururada samafalka (NGO), ciidamada nabad ilaalinta ee ajnabiga ah ayaa keentay dhimasho ((arag qeybta 1.g.).

Al-Shabaab waxa ay dileen dadka u dhaqdhaqaaqa nabadda, hogaamiyayaasha bulshada, odayaasha qabiilada, iyo xubnaha qoysaskooda waxa ay noqdeen bartilmaameed waana la dilay doorka ay ku leeyihiin isku dayga dib u dhiska nabadda. Waxa ay si joogta handadaad dil ah ugu geystaan ama dilaan dadka lagu tuhunsan yahay in ay u shaqeeyaan ama xiriir la leeyihiin dawladda ku meel gaarka ah.

Kooxaha xag jira ee hubeysan ee gobolada Juba, Bay iyo Bakool waxa ay xireen oo qudha ka jareen dhawr qof oo lagu eedeeyey in ay basaasiin yihiin. Tusaaale ahaan, 13kii Abriil waxa ay ku amreen ehaladii Xareed Cali Durduur in ay soo qaataan madaxii laga gooyey cisbitaal ku yaal magaalada Kismaayo ka dib markii laga afduubay gurigiisa. Al-Shabaab waxa ay sheegatay in Durdur uu telefoon kula xiriiray ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ee ku sugan Doobley, gobolka Gedo.

14kii Agoosto Al-Shabaab waxa ay dileen sagaal qof oo gaadiidka ka shaqeeya- lix wadayaasha gaadiidka ah iyo sadex lacagta ururiya ee Afgooye meel ka baxsan magaalada Muqdisho ka dib markii ay ku guuldareysteen in ay bixiyaan lacag baad ah.

Burcad badeeddu waxa ay geysteen dilal kala duwan sanadkan gudihiisa. Tusaaale ahaan, 22kii Febraayo burcad badeed ka hawlgasha gacanka Cadmeed ayaa dilay afar qof oo Mareykan ah oo ay ku afduubeen 4tii Febraayo.

Sanadkan gudihiisa ciidamada AMISOM waxa ay dileen qof ka tirsan saxaafadda iyadoo qof kale oo aan la garaneyn uu dilay shaqaalaha saxaafadda (arag qeybta 1.g and 2.a.).

Dagaal u dhaxeeya qabiilada, oo inta badan ku dagaalama biyaha iyo dhulka ee Puntland, taasoo keentay dhimashada iyo barakaca boqolaal qof oo soo barakacay. Dawladdu waxa ay ku sameysay baaritaan wax yar oo ka mid ah dacwadaha mana jiraan warbixino sheegaya in ay taasi keentay talaabo ay qaadaan hay'adaha degaanka ee caddaaladda. Waxaa kale oo jiray dagaalo ku saleysan qabiil oo ka dhacay Gaalkacyo, Puntland iyo dhulka baadiyaha ah ee ku hareereysan iyadoo sidoo kale ay jiraan dagaal nabad raadin ah oo lagu yareynayo iska hor imaadka qabiilka. Waxaa kale oo la soo sheegay dagaalo qabiilada oo la isku haysto daaqa iyo biyaha oo iyagana ka dhacay gobolada Mudug iyo Bari.

Miinooyinka dhulka ku aasan ayaa guud ahaan dalka oo dhan waxa ay keeneen dhimashada qaar k tirsan bulshada rayidka ah.

### b. Dadka la waayo

Ma jiro warbixino la xaqiijiyey oo sheegaya in dawladda ku meel gaarka ah, Puntland ama Somaliland ay geysteen dilal siyaasad ku dhisan ama dad la waayey sanadkan gudihiisa.

Al-Shabaab waxa ay afduubeen dad sanadkan gudihiisa, kuwaas oo ay ka mid yihiin ganacsato ka dhago adeygeen bixinta lacago baad ah. 25kii Agoosto waxa ay Al-Shabaab ay Ceelasha biyaha ee xerada dadka soo bara kacay ka afduubeen ganacsade Soomaaiyeed ee duleedka Muqdisho ka dib markii uu ka dhago adeygay bixinta lacag baad ah. Meel uu ku dambeeyey lama ogeyn ilaa dhamaadkii sanadkan.

21kii Luulyo waxa ay Al-Shabaab ka afduubeen degmada Balcad ee gobolka Shabeelada Dhexe qof haween ah oo dawladda ku meel gaarka ah u magacoowday wasiirka arrimaha haweenka, Caasha Cismaan Caaqil. Al-Shabaab waa ay sii daayeen isla maalintii ka dib markii ay u sheegtay in aanay dooneyn magacaabistaas.

Afduubka loo geysto shaqaalaha gargaarka bini'aadminimo iyo hay'adda samafalka oo ay geysteen Al-Shabaab waa dhibaato jirta (arag qeybta 1.g iyo 5). shaqaalaha hay'adda samafalka waxaa loo geystay afduub sanadka gudihiisa.

Tirada afduubka la xiriira burcad badeednimada ka hawlgasha gacanka cadmeed iyo Badweynta Hindiya waa uu yaraaday marka lala barbardhigo sanadkii hore taasoo ka dhalatay talaabooyinka ay qaadeen bulshada caalamiga ah iyo Puntland ee la dagaalanka burcad badeedda. Kooxda caalamiga ah ee u xilsaaran arrimaha burcad badeedda ee xeebaha ka baxsan Soomaaliya ayaa sheegay in burcad badeeddu ay gacanta ku hayaan ilaa 19 markab oo ay saaran yihiin shaqaale dhan 268 qof dhamaadkii sanadka.

Si ka duwan sanadihii hore, ma jiraan warbixino qabiilada oo afduubka u adeegsanaya waddo ay ku gaaraan xalinta khilaafaadkooda.

**c. Jirdilka, Cadawnimada kale, Waxyaabaha ka baxsan bini'aadminida, iyo hab dhaqanka bahdalka ama ciqaabta.**

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah (TFC) waxa uu dhigayaa in qofku xaq u leeyahay in uu helayo nabadgelyo. Dastuurka Puntland waxa uu dhigayaa in qofku xaq u leeyahay inuu helo nabadgelyo iyo ilaalinta sharafta qofka. Sidoo kale dastuurka Somaliland waxa uu mamnuucayaa ciqaabta jir dilka ah iyo dhaawacyada kale ee loo geysto dadka.

Waxaa jira warbixino sheegaya in ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo maleeshiyada raacsan ay geysteen xadgudub la xiriira galmoodka, oo ay ka mid yihiin kufsi loo geystay dumarka gudaha iyo agagaarka xeryaha dadka soo bara

kacay ee Muqdisho. kooxaha hubeysan ayaa la soo sheegay in ay kufsi u geysteen haweenka u sii socday xeryaha qaxootiga ee waddanka deriska ah ee Kenya. Iyada oo taa laga duulayo ayaa xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ee dawladda ku meel gaarka ah ku dhawaaqay 25ka Oktoobar gudiyada hawlgalka oo u xilsaran wax ka qabashada xadgudubka ku dhisan nooca jinsiga qofka. Taasi waxa ay keentay in la magacaabo sarkaal u xilsaaran rabshada ku dhisan jinsiga qofka. Sarkaalkaas ma aanu hawlgelin ilaa dhamaadkii sanadka.

Maamulka Somaliland waxa uu garaac u geystay shaqalaha warbaahinta (arag sidoo kale qeybta 2.a) Tusaale ahaan, 10kii Siteembar ciidamada nabadgelyada ee Somaliland waxa ay dagaal gacan ka hadal ah u geysteen Saleebaan Cabdi Cali, wariye u shaqeynayey wargeyska *Waheen* kaasoo la xiray muddo dhawr saacadood ah ka dib markii uu isku dayey inuu ka qeyb galay shir jaraa'id oo uu qabtay wasiirka arrimaha ee Somaliland.

28kii Diseembar ilaalada madaxweynaha Puntland ayaa la soo sheegay in ay garaaceen wariye isku dayey inuu wax ka qoro booqashada madaxweynaha dawladda ku meel gaarka ah uu ku tagay Boosaaso.

Waxaa kale oo jirey dhacdooyin la soo sheegay sanadkan gudihiisa in Al-Shabaab ay xadgudub iyo ciqaab adag u geystay dadka ku nool dhulka ay maamusho. Tusaaale ahaan, 12kii Abriil garoonka ciyaaraha ee Jowhar ayaa xubno madaxa soo dabuushay oo ka tirsan Al-Shabaab ay gacanta midig iyo lugta bidix ka gooyeen sadex nin oo lagu soo eedeeyay in ay geysteen burcad hubeysan. Kooxda Al-Shabaab waxa ay dadweynaha ku qasbaan in ay daawadaan ciqaabta noocaas ah. Sida ay shareecda u tarjunteen (sharceecada Islaamka) aya keentay in si aan loo sineyn, oo dhacdooyinka qaarkood, xukun aad u adag lagu rido (arag qeybta 1.e.). Dadka xubnaha laga gooyo, la garaaco, ama loo geysto xadgudubyo kale ayaa loo adeegsadaa dadka lagu tuhmo in ay ka qeyb qaadanayaan waxyaabaha lagu madadaasho ee la mamnuucay ama dharka u xirta hab loo arko in ay tahay mid aan habooneyn. Al-Shabaab waxaa kale oo ay adeegsataa hab cabsi gelin, garaac iyo jirdil ay dadku ku qirtaan dambiyada.

Waxaa jira warbixino aad u baahsan oo laga soo xigtay warbaahinta oo sheegaya xoogaga Al-Shabaab ay geystaan kufsi iyo xoog lagu guursado dumarka.

Gudniinka dumarka isna waa aad ugu baahsan (arag qeybta 6)

## Xaaladda iyo Xabsiyada Xarumaha dadka lagu hayo

Xaaladda xabsiyada waa kuwo aad u adag isla markaana khatar ku ah nafta bini'aadamka gobolada oo dhan. Tirada dadka oo ku badan, nadaafadda oo xun, daryeelka caafimaadka oo aan jirin; iyo cuntada iyo biyaha oo aan ku filenyn, hawo xumo iyo nalalka oo aan ku filneyn ayaa xaaladaha adag ee ka jirta xabsiyada iyo goobaha (xabsiyada) dadka lagu hayo dalka oo idil. Tusaaale ahaan, bishii Luulyo waxa ay Puntland ku xirtay 500 oo qof meel loogu talo galay in ay qaadi karo 200 oo qof. Qaaxada iyo sambabada oo biyo galaan intuba waa kuwo baahsan. Qoysaska dadka xiran iyo guud ahaan qabiilka uu ka dhashay waxaa laga filayaa in ay bixiyaan kharashka xabsi ku haynta. Meelo badan oo xabsiyada ah waxa ay dadka xiran cunto ka helaan eheladooda iyo hay'adaha gargaarka. Macluumaad la xiriira dad xabsiyada ku dhintay ayaa la soo sheegay mana jiraan goobo dadka lagu hayo inta ay maxkamadda sugayaan.

Saraakiisha xabsiyada ee dawladda ku meel gaarka ah waxaa ay sheegeen in qiiyaastii 400 oo maxbuus lagu hayo Xabsiga Dhexe ee Muqdisho. Bartimihii Nofeembar agaasimaha guud ee wasaaradda garsoorka ayaa u sheegay warbaahinta in qiyaastii 2,000 oo maxaabiis iyo dad xabsiyada lagu hayo ay ku jiraan xabsiyada Somaliland. Lama hayo macluumaad sugan oo sheegaya tirada maxaabiista iyo dadka xabsiyada lagu hayo ee Puntland.

Xabsiyada iyo xarumaha dadka lagu hayo, caruurta waxaa inta badan lala xiraa dadka waaweyn. Maxaabiista dumarka iyo ragga waa la kala saaraa. Dadka maxkamadaha sugaya iyo kuwa lagu helo dambiga lama kala saaro, gaar ahaan gobolada koonfureed iyo dhexe. maxaabiista xiran ee caruurta ah ee loo xiray codsiga qoysaskooda oo doonaya in caruurtooda loo edbiyo waa dhibaato weyn.

Maxaabiista iyo dadka xabsiyada lagu hayo ee maxkamadaha sugaya waa loo ogolaadaa in la soo booqdo inay cibaadeystaana waa loo ogol yahay. dawladda ku meel gaarka ah waxa ay diiday in Ururka Midowga Yurub iyo Qaramada Midoobay soo booqdaan xabsiyada ku yaal magaalada Muqdisho. Maamulka Puntland iyo Somaliland waxa ay ogolaadeen in hay'ado aan dawli aheyn oo madax banaan ay kormeer ku sam eeyaan xabsiyada. Sanadkan gudihiisa ma jirin booqashooyin ay Gudigga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) ku tageen xabsiyada; hase yeeshee, guddi maamul oo u kuurgala xaaladda xabsiyada oo ay abaabuleen Hay'adda Qaramada Midoobay U Qaabilsan Horumarinta Barnaamijyada (UNDP) oo ka kooban dhakhaatiir caafimaad, saraakiil dawladda ka tirsan iyo wakiilo ka tirsan bulshada rayidka ah ayaa sii waday in ay booqdaan xabsiyada Somaaliland. Maxaabiistu ma aanay laheyn cid ay cabashadooda u

gudbiyaan mana aanay jirin dariiqo kale oo ay ku horumarin karaan keydinta macluumaadka.

Maamulka Somaliland waxa ay baaritaan sheegasho lagu kalsoonaan karo oo sheegayo xaalado ka baxsan bini'aadminimada. Qiimeyntii sanadlaha aheyd ee lagu sameeyay xaaladda xabsiyada ee la sameeyey intii u dhaxeysay 13kii Luulyo ilaa 27kii Luulyo wakiilka aqalka odoyaasha ee u qaabilsan cadaaladda iyo gudiga xuquuqda aadanaha, oo ay taageerayaan Qaramada Midoobay ayaa booqday xabsiyada/goobaha dadka lagu hayo ee afar ka mid ah xarumaha gobolada Somaliland. Warbixin ay u soo gudbiyeen baarlamaanka, waxa ay ku faahfaahiyeen tirada dadka oo aad ugu badan; biyaha oo aan ku filneyn; nadaafad daro; iyo iyadoo aanay jirin goobo u gaar ah oo lagu hayo caruurta iyo haweenka.

Warbixin ay soo saareen khubaro ka tirsan koox madax banaan oo ka tirsan Qaramada midoobay ayaa ku tilmaamay "Xaaladdaha aad u xun ee Xabsiga dhexe ee Garoowe, gaar ahaan maxaabiista oo lagu hayo katiinadda lugaha lagaga xiro".

Al-shabaab waxa ay maamulaan xarumo dadka lagu hayo oo duqoobay dhulka ay gacanta ku hayaan ee koonfurta iyo gobolada dhexe. inkastoo aanay jirin tiro rasmi ah, macluumaad aan rasmi ahayn/aan la daabicin ilo xog ogaal ah ayaa ku qiiyaasay in kumanaan maxbuus oo laga soo xiray dhamaan dhulka ay gacanta ku hayaan kooxaha xag jira ay ku sugan yihiin xaaladd ka baxsan bini'aadminimada oo loo soo xiray dambiyo yaryar sida cabitaanka sigaarka, dhagaysiga muusigga, daawashada ama ciyaarista kubadda cagta iyo iyaga oo aan xiran xijaabka.

## d. Xarig aan sabab lahayn iyo Xabsi ku heyn

Ciidamada nabadgelyada ee dawladda ku meel gaarka ah, maleeshiyada raacsan dawladda ku meel gaarka ah, maamulka Puntland iyo Somaliland, Al-Shabaab iyo maleeshiyada qabiilada kala duwan ee waddanka oo idil ayaa geysta xarig aan loo kala aabo yeelin iyo xabsi ku heyn, oo ay ka mid yihiin shaqaalaha warbaahinta (arag qeybta 2.a.) .

Hay'adaha degaanka iyo kuwa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ayaa soo sheegay in dawladda ku meel gaarka ah ay xirtay dad yar marka lala barbardhigo sanadkii hore kuwaas oo markiiba si dhaqso leh lagu sii daayo.

Ciidamada nabadgelyada ee Puntland waxa ay geysteen xarig aan loo kala aabo yeelin markiiba marka ay dhacaan shilalka la xiriira xagga amaanka. Xarigga

noocaas ah waxaa inta badan loo geystaa shaqalaha warbaahinta iyo dadka ka yimaada gobolada dhexe iyo koonfurta.

Tusaaale ahaan, 11kii Agoosto ciidamada Puntland waxa ay dhex galeen raxan ay la socdeen saraakiil ka tirsan Somaliland ee gobolada Sool iyagoo xiray 19 qof. Mid ka mid ah saraakiisha Somaliland ayaa lagu dilay iska hor imaadkaas iyadoo dhawr kale lagu dhaawacay. Maamulka Puntland waxa ay xabsiga ka sii daayeen sideed ka mid ah dadkii xabsiyada lagu xiray ka dib markii la cadeeyey in aanay aheyn saraakiil ka tirsan Somaliland. 24kii Agoosto maxkamad Puntland ka tirsan ayaa ku xukuntay sideed sarkaal xabsi u dhaxeeya shan ilaa 10 sano ka dib markii lagu soo eedeeyay "in ay qalalaase galiyaan deganaashaha Puntland" 24kii Nofeembar madaxweynaha Puntland ayaa cafis u fidiyey sideedda sarkaal ee horey loo xiray.

Kooxda Al-Shabaab ee gobolada dhexe iyo koonfurta ayaa geysta xarig aan sabab laheyn ka dib marka ay ku guuldareysteen inay bixiyaan ganaax lagu soo rogay ka dib marka lagu tuhmay inay taageerayaan dawladda ku meel gaarka ah. Tusaale ahaan, 17kii Maajo Al-Shabaab waxa ay xireen 10 ka tirsan oday dhaqameedyada Kismaayo ka dib markii ay diideen inay gacan ka geystaan dadaal lagaga soo horjeedo dawladda ku meel gaarka ah. 17kii Oktoobar waxa ay Al-Shabaab waxa ay Ceelbuur ku xireen 20 oday dhaqameed lagu soo edeeyey in ay gacan saar la leeyihiin kooxda Ahlu Suna Wal Jamaaca (ASWJ) oo weerar qorsheysan ku soo qaaday Al-Shabaab. Dadka magaalada degan ayaa ka soo horjeestay xiritaankaas, taasoo dhalisay in Al shabaab ay markiiba sii dayaan odayaasha ka dib markii ay xirnaayeen muddo todobaad ah.

## Doorka Ciidamada nabadgelyada iyo Ciidamada Amaanka

Ciidamada nabadgelyada ee Soomaaliya waxa ay hoos yimaadaan maamul goboleedyada iyo dawladda ku meel gaarka ah. Muqdisho waxaa ka hawlgala laba ciidan ee nabadgelyo, mid waxa uu hoos yimaadaa dawladda ku meel gaarka ah midka kalana maamulka gobolka Banaadir. Ciiidamada dawladda waxa lagu magacaabaa ciidanka qaranka waxaana uu hoos yimaadaa Wasaarada Arrimaha Gudaha Taliyayaasha ciidamada nabadgelyada ee dawladda ku meel gaarka ah waxaa magacaaba madaxweynaha dawladda ku meel gaarka ah. Dhamaadkii sanadkan ciidanka nabadgelyadu ma gaarsiisneyn dibadda magaalada Muqdisho. Somaliland iyo Puntland mid walba gooni ahaantiisa ayuu u leeyahay ciidamada nabadgelyada ee u gaarka ah. Cidamada nabadgelyada waxa ay hoos yimaadaan maamulada halkaas ka jira.

Cidamada nabadgelyadu ma aha kuwo awood badan ku leh gobolada koonfurta iyo dhexe, maadaama uu dhulkaas intiisa badan gacanta ugu jiro Al-Shabaab. Waa kuwo aan la siin mushahar musuqmaasuquna ku badan yahay. Marka laga reebo tiro yar oo UNtu ay tababartay kuwaas oo loo yaqaan Cutubyada Ciidamada Nabadgelyada, kuwaas oo xubno ay ka yihiin ciidamada nabadgelyada ee dawladda ku meel gaarka ah ee Muqdisho ciidamdu waxa ay si toos ah ugu qeyb qaataan khilaafaadka siyaasadeed iyagoo daacad u ah mowqifka qabiilkooda xiriirna la leh qoysaskooda Sidii ay aheyd sanadihii la soo dhaafay, waxaa jira warbixino dhinaca warbaahinta ah oo sheegaya in ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ay si aan kala sooc lahayn rasaas ugu fureen bulshada rayidka ah, geysteen xarig aan sabab laheyn iyo xabsi ku heyn, lacago baad ah, bililiqeysi iyo qashqashaad.

29kii Oktoobar aqalka wakiilada ee Somaliland ayaa ansixiyey abuuritaanka sharciga amaanka qaranka iyo kala dambeynta dadweynaha ee heer qaran, gobol iyo degmo oo uu shir gudoominayey madaxweynaha, gudoomiyayasha gobolada iyo degmooyinka sida ay u kala horeeyaan oo ay ka soo qeyb galeen wasiirada wasaaradda arrimaha gudaha iyo difaaca iyo madaxda amaanka oo iyagana xubno ka ahaa. Si ka duwan gudigii hore ee nabadgelyada qaranka, ee la baabi'iyey bishii Luulyo ee 2010kii, gudiyadni ma laha awood sharci dajin ah oo ay xukun ku qaadi karaan ama xirir karaan dadweynaha, sharciga cusubi waxa uu ka mamnuucayaa hay'adaha nabadgelyadu in ay dhinac maraan nidaamka maxkamadaha ee rasmiga ah.

Gobolada dhexe iyo koonfurta, Puntland iyo Somaliland marmar dhif ah ayaa lagu sameeyaa baaritaan xad gudubyada ay geystaan ciidamada nabadgelyada iyo maleeshiyooyinka iyadoo saraakiisha dawladda oo aan sharciga lagu qaadin ay weli tahay dhibaato jira. Guud ahaan ciidamada nabadgelyadu waxa ay ku fashilmeen in ay ka hortagaan ama u gurmadaan rabshadaha bulshada ka dhex dhaca

## Nidaamka Xiritaanka iyo Sida loola Dhaqmo Dadka La Hayo

Sharciyadii hore ee u degsan dalka si loo xiro qofka waxaa waajib ahayd in loo soo bandhigo saraakiisha awoodda u leh caddeymo ku filan in la soo xiro dadka lagu tuhunsan yahay; isla markiiba la wargeliyo waxyaabaha lagu soo eedeeyey iyo go'aanka cadaaladda; isla markiiba loo ogolaado qareen iyo xubnaha qoyska; iyo xuquuqaha kale ee sharcigu u ogol yahay; hase yeeshee, u hogaansanaanta nidaamka waa mid naadir ah hase yeeshee, nidaamkan oo la raacaa waa mid aad naadir u ah. Hase yeeshee, ma jirin nidaam damaanad oo qofka lagu sii daayo oo

shaqeynaya ama u dhigma. Cidamada nabadgelyada ee dawladda ku meel gaarka ah iyo saraakiisha cadaaladda ee musuqmaasuqa aafeeyay, siyaasiyiinta, iyo odayaasha qabiilada ayaa saameyn ku leh oo sii daaya dadka la xiro.

Xarig aan sabab lahayn dawladda ku meel gaarka ah, Somaliland iyo Puntland waxa ay geystaan xarig aan sabab laheyn iyadoo la xiro dad aan waxba galabsan, oo ay ka mid yihiin dadka lagu soo eedeeyo argagixisanimada iyo inay taageerayaan Al-Shabaab. Waxa ay si joogta ah u adeegsadaan sheegashada kuwa raacsan Al-Shabaab oo ay sabab uga dhigaan xarig aan sabab lahayn.

Maamulka Somaliland waxa uu mararka qaarkood xiray dad ka tirsan qabiilada oo lagu eedeeyo in ay geysteen dil. Tusaaale ahaan, wasraadadda arrimaha gudahu waxa ay amartay in la soo xirxiro sagaal qof oo ka tirsan qabiilada aoo lagu soo eedeeyay in ay xiriir la leeyihiin shilkii ka dhacay 5tii Diseembar kaasoo sadex qof lagu dilay Gabiley. Dhamaadkii sanadka weli xabsi ayey ku jireen.

## e. Diidmada Dhagaysi Maxkamadeed oo Dadweynaha u Furan Caddaaladna ku Dhisan

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxa uu ogol yahay garsoor madaxa banaan, laakiin nidaamka garsoorku waa mid aan ka jirin gobolada koonfurta iyo dhexe. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa aburitaanka Guddi sare oo cadaaladda, Maxkamadda badbaadada, maxkamadda racfaanka, maxkamadaha dhagaysta dacwadaha. Gobolada qaarkood waxa ay abuureen maxkamado degaanka ah taasoo ku xiran hadba qabiilka ku badan iyo maamulka ay raacsan yihiin. Inta badan maamulka cadaaladda waxa uu ka kooban yahay xubno ka tirsan hab dhaqameedka soo jireenka ah, shareecada iyo sharciga madaniga ah ee wixii ka horeeyay 1991kii dawladdii Maxamed Siyaad Barre.

Shariicada ayaa laga dhaqan geliyey dhulka ay Al-Shabaab gacanta ku heyso.

Dastuurka Somaaliland waxa uu dhigayaa abuuritaanka guddi cadaaladda oo madax banaan; hase yeeshee, dhab ahaantii cadaaladdu ma aha mid madax banaan. Maxkamado shaqeynaya way jiraan, inkastoo ay jirto khatar ba'an oo ku haysa jirtaan la'aanta qaaliyaal la tababaray iyo yaraanta qoraalada lagu dhiso karo fulinta cadaaladda. Ciidamada nabadgelyada oo aan lahayn tababar ku filan iyo shaqaalaha oo aqoon u lahayn ayaa la soo sheegay in ay qaali ka noqdaan maxkamadaha. Maxkaadaha, garsoorka iyo wakiilada gudigga xuquuqda aadanahu waxa ay soo sheegeen faragelin baahsan oo saraakiisha dawladda ka tirsan ku sameeyaan nidaamka maxkamadaha. Hay'adaha samafalka ee caalamiga

ah waxa ay sheegeen in saraakiisha degaanka inta badan fara gelin ku sameeyaan arrimaha sharciga taasoo sharciyada kala dambeynta dadweynaha loo adeegsado in lagu xiro oo xabsi lagu hayo dadka iyada oo aan loo qaban dhagaysi maxkamadeed.

5tii Siteembar saraakiisha Somaliland waxa ay xireen wariye u shaqeynayey wargeyska *Waheen* Axmed Muuse Maxamed "Sagaaro" ee gobolka Togdheer iyada oo aanay u heysan amar maxkamadeed. 7dii Steembar ayaa qaali ka tirsan maxkamadda amar ku bixiyey in xabsiga lagu hayo muddo todobaad ah. Sagaaro waxaa la sii daayey 12kii Siteembar iyada oo wasiirka arrimaga gudaha iyo xeer ilaalinta guud ay "damaanad qaadayaan" talaabooyinka uu qaadayo.

Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland waxa uu ogol yahay garsoor madaxa banaan, hase yeeshee, waxaa jiray warbixino sheegaya in maamulku fara gelin ku sameeyeen oo ay saameyn ku yeesheen dhacdooyinka la xiriira shaqaalaha warbaahinta. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu ogol yahay abuuritaanka maxkamadda sare, maxkamadaha racfaanka iyo maxkamadaha dhagaysta dacwooyinka. Marka laga tago waxyaabaha la xiriira shaqeynta maxkamadahu awood uma laha in sharcigu si loo siman yahay dadka u ilaaliyo

Xaaladaha qaarkood Al Shabaab waxa ay maamulka maxkamadahooda u xilsaaraan dad aan aqoon badan u laheyn shareecada Islaamka. Sida ay shareecada u tarjubaan Al-Shabaab waxa ay dhalisay in ay geystaan ama fuliyaan xukun arxan daro ah oo aad u fool xun. Tusaaale ahaan, 22kii Agoosto degmada Deyniile oo ka tirsan Muqdisho waxa ay toogasho saf balaaran ah ku dileen sadex nin oo lagu tuhmay khiyaamo. Al-Shabaab waxa ay qudha ka jareen 12 dhalinyaro ah degmada Huriwaa iyo Deyniile ee Muqdishointii u dhaxeysay todobaadkii u horeeyay iyo kii labaad ee Agoosto. Wax sabab ah looma yeelin madax goyntaas; waxaa la aaminsan yahay in Al-Shabaab ay dilkaas u geysteen iyagoo aaminsanaa in ay dhalinyaradaasi basaasiin u ahaayeen dawladda ku meel gaarka ah. Waxaa jiray warbixino sheegaya in Al-Shabaab ay xubnaha ka jareen dad lagu tuhunsan yahay tuuganimo yar oo dhagax ay ku dileen dad lagu tuhunsan yahay dhileysi.

Oday dhaqameedka ayaa dhexdhexaadin ka geystay dagaalo dhex maray qabiilada dalka oo idil Qabiiladu waxa ay si joogta ah u adeegsadaan hab dhaqameed caddaaladda loo sameyn jirey; kaas oo ah mid dhaqso badan. go'aanka ka soo baxa hab dhaqameed waxaa mararka qaarkood mas'uuliyaddiisu saaran tahay qabiilka oo dhan kaasoo qabiilka uu ka dhashay qofka lagu soo eedeeyey inuu jabiyay sharciga.

## Nidaamka Dhagaysiga Maxkamadaha

Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu qofka xaq u siinayaa dhagaysi maxkamadda oo ay qabato maxkamad sharci ah. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa qof kasta waxaa loo aqoonsanayaa in qofku uusan dambiile ahayn, xaq waxa aad u leeyahay in aad goob joog tahay oo aad la tashato qareen mar kasta, lagu siiyo waqti kugu filan si aad ugu diyaar garoowdo difaacaaga waxaa kale oo sharcigu dhigayaa in loo fidiyo qareen lacag la'aan ah dadka aan awooda u lahayn in ay qabsadaan qareen. Iyadoo aan si cad loogu sheegin dastuurka ku meel gaarka ah waxaa jirta in la aqoonsan yahay xaqa aad u leedahay dhagaysi maxkamadeed oo dadweynaha u furan, xaqa aad u leedahay in aad markhaatiyaal iyo caddeymo aad maxkamadda hor keento iyo xaqa aad u leedahay in aad racfaan ka qaadato Inta badan xaquuqdaas lama ixtiraamo sida dhabta ah mana jiro dhul laga dhaqangeliyey hab dhaqameed ama nidaamka sharciyada ama shareecada.

Inkastoo ay dadweynahu soo dhaweeyeen abuuritaanka maxkamadaha malateriga ee dawladda ku meel gaarka ah ee sanadkii 2009kii ee wax ka qabashada xad gudubka daweynaha, taasoo soo baxday 2004 kana dhalatay jiritaan la'aanta nidaamka iyo ciqaabaaha adag ee lagu soo rogo iyada oo aan la marin dhageysi maxkamadeed oo cadaalad ku dhisan ee lagu qaado xubnaha ciidamada nabadgelyada iyo dadka rayidka ah. Eedeysanayaasha la hor keeno maxkamadaha melitariga ah ma helaan difaac sharci ku dhisan iyo xaqa ay u leeyihiin racfaanka. Kuwa lagu xukumay dilka waxaa lagu dilay saacado gudahood ka dib go'aanka maxkamadda (sidoo kale arag qeybta 1.a). 8dii Agoosto maxkamadaha malateriga ayaa daldalaad ku xukuntay sadex askari oo lagu eedeeyay in ay telefoonada gacanta ka xadeen suuqa Bakaaraha saacado gudahood ayaana lagu daldaly. 13kii Agoosto xaalad degdeg ah ee dalka ku jiro ayaa maxkamadaha melateriga awood u siiyey in ay dhageystaan dacwadaha fal dambiyeedka oo ay ka mid yihiin kuwa lagu qaado dadka madaniga ah, o qeyb ka mid ah Muqdisho taasoo ah dhulka ay ka baxeen Al-Shabaab.

December xeer ilaalinta maxkamadaha ayaa soo saaray war saxaafadeed iyagoo uga digay ciidanka nabadgelyada in ay dadka ku hayaan xabsiyada iyaga oo aan maxkamad soo taagin wax ka badan 48 saacadood.

Guud ahaan eedeysanayaasha waxaa loo aqoonsan yahay in aanay dambiile ahayn, xaqna u leeyihiin in dhagaysi maxkamadeed oo dadwaynaha u furan,xaqna ay u leeyihiin in uu joogo oo la tashtaan qareen dhamaan marxaladaha kala duwan ee dhagaysiga maxkamadda. Eedeysanayaasha waxa ay su'aalo weydiin karaan markhaatiyaasha goob jooga ah iyo caddeymaha lidiga ku ah iyagoo xaq u leh in

ay racfaan ka qaadan karaan. Somaaliland waxa ay u fidisaa eedeysanayaasha wakiilo matala oo lacag la'aan oo lagu soo eedeeyay fal dambiyeed oo aan awood u lahayn in ay qabsadaan qareen gaar ah.

Odayaasha qabiilada ee Puntland ayaa xaliyey dacwadaha ugu waaweyn iyaga oo adeegsanaya hab dhaqameed soo jireen ah oo loo yaqaan "Xeer". Dadka aan qabiiladoodu ku badneyn Puntland waxaa lagu xukumaa xeerka garsoorka ee maamulka u degsan. Nidaamkaas, dastuurka Puntland waxaa eedeysanayaasha u aqoonsan yahay in aanay dambiile ahayn, xaqna u leeyihiin in uu la joogo oo la tashtaan qareen dhamaan marxaladaha kale ee dhagaysiga maxkamadda. Eedeysanayaasha waxa ay su'aalo weydiin karaan markhaatiyaasha goob jooga ah iyo caddeymaha lidiga ku ah iyagoo xaq u leh in ay racfaan ka qaadan karaan. Hase yeeshee, waxaa jirey xaalado la soo sheegay oo madaxda maamulka iyo saraakiishu ay fara gelin ku sameeyeen dacwadaha lagu qaado dadka caanka ah iyo xubnaha ciidamada nabadgelyada (fiiri qeybta 2.a).

Dhulka ay Al-Shabaab ka taliso kama jiro wax lagu tilaami karo nidaam garsoor. Maxkamadaha islaamiga ah eedeysanayaasha lama siiyo fursad ay isku difaaci karaan, ay markhaatiyaal dhinacooda ah ku keeni karaan maxkamadda, ama ay qareen difaaca ku qabsan karaan.

**Maxaabiista Siyaasadda iyo Ii hayda**

Dawladda ku meel gaarka ah, Somaliland iyo Puntland waxa ay xarig u geysteen shaqaalaha warbaahinta sanadkan gudihiisa (arag qeybta 2.a). Maamulka Puntland waxa uu xiray saraakiil ka tirsan maamulka Somaliland (arag qeybta 1.d).

**Nidaamka Cadaaladda ee Dacwadaha Madaniga ah.**

Awood la'aanta nidaamka cadaaladda ee lagu qaado dacwadaha madaniga ah waxaa ka mid ah ka qeyb qaadashada arrimaha deymaha, khilaafaadka heshiisyada kuwaas oo dhiiri gelisay dagaalada dhex mara qabiilada ka dib mar ay isku dayaan in ay arrimahooda xaliyaan taasoo kordhisay khilaafka u dhaxeeya qabiilada. Ma jiro dacwad xagga sharciga ah oo lagu weydiisanayo magdhaw xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee ka dhaca gobolada.

**f. Faragelin Sabab La'aan ah oo Lagu Sameeyo Qoyska, Waxyaabaha Gaarka u ah, Guryaha iyo fariimaha.**

Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu siinayaa magan gelin qofka iyo hantidiisa. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland iyo dastuurka Somaaliland waxa ay aqoonsan yihiin xaqa uu qofku u leeyahay hanti gaar ah. Waxaa jiray warar sheegaya in dawladda ku meel gaarka ah, Puntland iyo Somaliland ay xad gudub ku sameeyeen xuquuqdaas, sidoo kalana Al-Shabaab ay sameeyeen.

3di Juun Al-Shabaab waxa ay galkeen guriga qoys degan degmada Jawhar, gobolka Shabeelada Dhexe oo gacanta ku dhigeen telefishin iyo qalabka dayax gacmeedka kuwaas oo lagu tuhmay in ay daawanayeen telifishanka qaranka ee ay maamusho dawladda ku meel gaarka ah. Bishii Luulyo waxa ay Al-Shabaab soo saartay digniin ay dadka degan Jawhar kaga mamnuuceyso daawashada telefishanka dawladda waxaana jiray warbixino sheegaya in Al-Shabaab ay galeen guryaha dadka si ay u dhaqan geliyaan mamnuucidaas. 10kii Agoosto waxa ay Al-Shabaab dadka dayax gacmeedka leh ku wargeliyeen in ay dayax gacmeedkooda u duwaan dhinaca bariga kaasoo aanu soo qaban karin telefishinka dawladda ama dayax gacmeedkooda lagala wareegayo.

Waxaa dhacday dhawr jeer in Al-Shabaab ay dad ka saareen guryahooda oo ay dajiyeen madaxda Al Shabaab. 31kii Maajo waxa ay dad degan xaafadda Hawlwdaag ee degmada Jowhar xoog kaga sareen guryahooda, kuwaas oo uu ka mid ahaa oday dhaqameed caan ah.

6dii Agoosto xoogagga Al-Shabaab waxa ay dib uga gurteen Muqdisho iyagoo oo baneeyey guryo ay horey uga qaateen dadkii deganaa magaalada Muqdisho ama laga guuray xiligii ay dagaalada dhex mareen kooxaha xag jira iyo ciidamada Itoobiya. Dadka si tartiib tartiib ah ayey dib ugu soo noqdeen guryahooda, taasoo keentay muran xaga dhulka la xiriira. Ma jirin hab degsan oo wax looga qabanayey khilaafaadkaas.

## g. Adeegsiga Awood Dheeraad iyo Xadgudubyada kale ee Khilaafaadka Gudiga

### Dilalka

Sanadkan gudihiisa dagaalada u dhaxeeyay dawladda ku meel gaarka ah, kooxaha raacsan dawladda, AMISOM iyo Al-Shabaab waxa ay sababtay dhimasho iyo dhaawac soo gaara kumanaan qof oo ku nool Soomaaliya iyo dad fara badan oo bara kacay. Hay'adda samafalka ee xuquuqda aadanaha ee Elman waxa ay sheegtay in 1,400 oo qof oo rayid ah ay Muqdisho oo kaliya ku dhinteen lixdii bilood ee ugu horeysay sanadkan. UNICEF waxa ay sheegtay in 15kii

Nofeembar ay iska hor imaadka ku dhinteen 100 caruur ah kuna dhaawacmeen ilaa 300 sanadkan gudihiisa. Sida laga soo xigtay Huma Rights Watch Al-Shabaab wxa ay dugsiyada u adeegsadaan goob ay rasaasta ka soo ridaan iyadoo ay ardeydu gudaha ku jiraan. Intii ka horeysay 6dii Agoosto Al-Shabaab waxa ay maalin walba weerar kaga soo qaadi jireen dawladda ku meel gaarka ah iyo AMISOM ee Muqdisho, waxaana jiray warbixino sheegaya dhimashada dad rayid ah oo ku dhintay jawaabta ay ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo ciidamada AMISOM ka bixiyaan weeraradaas. Korjoogayaasha caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha waxa ay ku eedeeyeen dhamman qeybaha kala duwan ee dagaalamaya in si aan kala sooc lahayn ay weerar ugu qaadaan uguna daadgureyaan ciidan meelaha dadku ku badan yahay oo ay ku fashilmeen in ay qaadaan talaabooyin lagu yareynayo dhibka soo gaara bulshada rayidka ah. Sida laga soo xigtay qiimeyn uu sameeyay Ururka Caafimaadka Aduunka (WHO) sadexda isbitaal ee ugu waaweyn magaalada Muqdisho waxaa lagu daweeyey 7, 799 qof oo dhaawac ka soo gaaray dhawaacyo la xiriira rasaasta intii u dhaxeysay 1da janaayo ilaa Diseembar 18.

Tusaaale ahaan, 12 kii Abrill weerar madaafiic ah oo ay soo qaadeen Al-Shabaab waxaa ku dhintay laba qof oo rayid ah iyadoo ay ku dhaawacmeen ilaa 30 qof ka dib markii madaafiic loo waday baarlamanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka ay ku dhaceen xaafado u dhow halkaas. 9kii Juun waxyaabaha meesha fog laga maamulo ayaa dilay sagaal ka tirsan ciidamada nabadgelyada ee dawladda ku meel gaarka ah iyadoo ay ku dhaawacmeen dhawr qof oo rayid ah degmada Xamar jajab. 16kii Juun dagaal ku dhex maray degmada Hawlwadaag ee Muqdisho kooxda Ahlu Suna Wal Jamaaca iyo Al-Shabaab waxaa lagu qiyaasay in ay ku dhinteen 10 qof oo rayid ah kuna dhaawacmeen ilaa 22 qof. 21kii Juun waxyaabaha qarxa ee lagu aaso hareeraha waddooyinka oo ay Al-Shabaab bartilmaameed ka dhigteen AMISOM iyo ciidamada dawladda ku meel gaarka ah waxaa ku dhintay afar qof oo rayid ah oo laba ka mid ah ay haween yihiin degmada Hodan ee Muqdisho.

Madaafiic ay isweydaarsadeen AMISOM iyo Al-Shabaab ayaa sababtay dhimashada in ka badan boqolaal qof oo rayid ah oo deganaa suuqa Bakaaraha intii u dhaxeysay Janaayo ilaa Juun. Habka ay u dagaal galaan ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo AMISOM ayaa sababay yaraashaha dhimashada ka dhalata rasaasta la isweydaarsanayo

6 dii Agoosto ka dib markii ay Al-Shabaab dib uga gurteen Muqdisho waxaa kordhay weerarada dhuumaaleysiga ah. 4tii oktoobar 4 gaari oo lagu soo xiray waxyaabaha qarxa ee meesha fog laga hago ee gawaaarida lagu xiro ayaa ku qarxay dhawr dhisme oo ka mid ah dhismayaasha wasaaradaha dawladda ku meel

gaarka ah. Qaraxyadaas waxaa ku dhintay in ka badan 100 qof, oo ay ka mid yihiin ardeyda jaamacadaha oo saf ugu jiray in loo sheego natiijada imtixaanka deeq waxbarasho ay dawladdu ugu deeqday. Al-Shabaab ayaa sheegatay mas'uuliyadda weerarka

2dii Siteembar waxa ay ciidamada AMISOM magaalada Muqdisho ku dileen suxufi u dhashay Maleeshiya oo la yiraahdo Noramfaizul Maxamed iyagoo ku dhaawacay mid kale ka dib markii ay rasaas ku fureen gaari ay saarnaayeen. Suxufiyiintu waxa ay la socdeen hay'ad samafal ah oo laga leeyahay maleeshiya oo qiimeyn ku sameyneysa baahida gargaarka bini'aadminimo. Ka dib markii baritaan lagu sameeyey shilka waxa ay bixisay AMISOM cudurdaar iyagoo ku taliyey in askariga reer Burundi ee ku lugta lahaa toogashadaas maxkamad lagu saaro nidaamka garsoorka ee Burundi. Dawladda Burundi waa ay diiday in ciidamada nabad ilaalinta ay ka qeyb qaateen toogashadaas waxa ayna codsadeen in baaitaan madax banaan ay sameeyaan Ururku Midowga Afrika. Ilaa dhamaadkii sanadka askariga la hadal hayo maxkamad lama soo taagin ama kuma noqon Burundi waxaana uu ka tirsanaa ciidamada Burundi ee ka jooga Soomaaliya.

Oktoobar waxaa biloowday weerar ay ciidamada Kenya kaga soo talaabeen xuduudda ay Kenya la leedahay Soomaaliya iyaga oo ku jeeda magaalada Afmadoow in dadka rayidka ah ay ka qaxaan dhulka ay marayaan ciidamada Kenya. UNCEF waxa ay sheegtay in qalalaasaha ka dhashay dagaalada u dhaxeeya ciidamada Kenya iyo Al-Shabaab uu sababay dhimashada 24 caruur ah dhaawacna ka soo gaaray 60 kale bishii Oktoobar.

30 kii Oktoobar weerar ay ciidamada cirka ee Kenya ku qaadeen magaalada Jubada Dhexe waxa uu gantaal ku dhacay xero ay degan yihiin dad soo barakacay. Sida laga soo xigtay Dhakhaatiirta Aan Xuduudda Laheyn, waxa ay sheegeen in gantaalkaas dilay 5 qof ayna ku dhaawacmeen 45 qof oo intooda badan ay caruur iyo dumar ahaayeen. Afhayeen u hadlay ciidamada gaashaandhigga ee Kenya waa uu beeniyey in dad rayid ah ay ku dhinteen isagoo sheegay in goobaha ay duqeeyeen ay xarumo u ahaayeen Al-Shabaab oo dadka soo bara kacay ka dhiganay gabaad.

Si ka duwan sanadihii hore, sanadkan tiro yar oo miinooyinka dhulka lagu aaso ah oo aan qarxin ayaa la soo sheegay. 16kii Luulyo duleedka magaalada Xudur ee gobolka Bakool laba caruur ah ayaa lagu dilay kuwo kalana waa lagu dhaawacay iyagoo ku ciyaaraya waxyaabaha qarxa.

kooxaha hubeysan ayaa ku dagaalamay Muqdisho, gaar ahaan qeybsashada cuntada ay soo bililiqeystaan iyo lacagaha baadda ah. Tusaale ahaan, 30kii Agoosto kooxo hubeysan oo ka tirsan dawladda ku meel gaarka ah ayaa ku dagaalamay wadada Maka Al Mukarama halkaas oo ay ku dhinteen 15 qof oo ay ka mid yihiin lix qof oo rayid ah. Dagaaladaasi waxa ay dheceen ka dib markii ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ay bililiqesyteen gargaarka cuntada ee bini'aadminimo.

Ugu yaraan shan ka mid ah shaqaalaha gargaarka ayaa lagu dilay sanadkan. Tusaaale ahaan, 23kii Diseembar degmada Matabaan ee gobolka Hiiraan nin hubaysan ayaa sadex ka mid shaqaalaha gargaarka ku dilay oo ay ka mid ahaayeen laba qof oo u shaqeynayey Barnaamijka Cuntada Aduunka ka dib markii shaqaaluhu ogaadeen isdaba marin laga sameeyey xerada dadka soo bara kacay. Kooxda Ahlu Suna Wal Jamaaca ayaa xiray ninka dilka geystay waxaana la ogsoon yahay inuu u xirnaa iyaga oo la sugayey waxyaabaha ka soo baxa baaritaan ay sameeyeen.

**Afduubka**

Afduub ayaa loo geytay shaqaalaha gargaarka bini'aadminimo sanadkan, iyada oo qaar ka mid ah shaqaalaha gargaarka ay u xirnaayeen.

14kii Diseembar Al-Shabaab waxa ay afduub u geysteen sadex qof oo ka tirsan ICRC oo shaqaale qaran oo deganaa duleedka magaalada Muqdisho. Waxaa loogu yeeray shir Al-Shabaab ay ku qabteen degmada Deyniile. Markii ay halkaa yimaadeen, waxa ay gacanta ku dhigeen sanduuq wax lagu xareeyey. Waxaa la sii daayey 15kii Diseembar.

**Xadgudubka jirka, Ciqaabta iyo Jirdilka**

Waxaa jiray warbixino sheegaya in ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo kooxaha raacsan ay geysteen xad gudub dhinaca galmoodka, oo ay ka mid yihiin kufsi, dumarka ku nool xeryaha dadka soo bara kacay ee agagaarka Muqdisho (fiiri sidoo kale qeybta 1.a., 2.d., iyo 6, dumarka). Ciidamo aan qorneyn ama kooxaha hubeysan ayaa la soo sheegay in ay kufsi u geysteen haweenka u sii socday xeryaha qaxootiga ee waddanka deriska ah ee Kenya.

Waxaa jiray dhacdooyin la soo wariyey oo sheegaya xadgudub ay Al-Shabaab ka geysteen dhulka ay gacanta ku hayaan oo ay ka mid tahay ciqaab arxandaro ah (fiiri qeybta 1.a., 1.b, iyo 1.e).

4tii Siteembar maydka laba qof oo madaxa laga jaray ayaa laga helay degmada Huriwaa oo ka tirsan Muqdisho oo ay gacanta ku hayaan Al-Shabaab. Waxaa ka muuqday jirdil loo geystay ka hor intii qudha laga jarin.

## Caruurta Askarta La Qoro

Warbixino isa soo taraya ayaa sheegaya in dawladda ku meel gaarka ah iyo maleeshiyada raacsan ay caruurta u qortaan ciidamada. Marka la heli karo shahaado dhalasho oo muujineysa xilliga dhalashada, inta badan way adag tahay da'da saxa ah ee dadka loo qoranayo ciidamada nabadgelyada. "Xeryaha" ciidamada gaashaandhigga ma aha mid si cad loo qeexay Muqdisho, askartuna waxa ay ku nool yihiin kana dagaalamaan meel u dhow qoyskooda. Qoysaska oo ay ka mid yihiin caruurta loo qaatay askarta--waxa ay imanayeen oo lagu arkayey xeryaha qaxootiga.

Sida laga soo xigtay Human Rights Watch, dawladda ku meel gaarka ah waxa ay su'aalo weydiisay caruur Al-Shabaab u dagaalamayey ama laga qabtay, iyadoo lagu xiray xeryaha dawladda ku meel gaarka ah iyo dhismayaasha caruurta lagu hayo.

Bishii Janaayo waxa uu Ra'iisul Wasaarrahu magacaabay gudi hawlgal oo dawladda ku meel gaarka ah u magacoowday caruurta askarta loo qoranayo. Todoba bilood oo gudigani hawlgal ahaa, wax yar ayey qabteen, iyadgoo sabab ka dhiganaya in aanay heysan kheyraad ay ku hawlgalaan. 15 Luulyo taliyaha ciidamda ayaa soo saaray amar uu ku amrayo taliyayaasha in ay xaqiijiyaan inaan cauur loo qoran ciidamada. Ilaa dhamaadkii sanadkan laba sarkaal ayey dawladdu u magacoowday in ay arrintaan wax ka qabtaan. Waxaa intaa dheer, in bishii Diseembar taliyaha ciidamadu uu magacaabay in sarkaalka u xilsaran ka hortagga caruurta uu la shaqeeyo bulshada calamiga ah oo wadajir ay uga shaqeeyaan barnaamij lagaga hortagyo caruurta loo qoro askarta.

Ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ee tababarka ku qaadanaya Bihanga, Uganda waxaa la mariyey laba marxaladood oo wareysi afka ah iyo baaritaan caafimaadka ah oo lagu xaqiijinayo in aan caruurta loo qorin askarta. Waxaa la qoray 960 qof oo soo gaaray goobta tababarka bishii Febraayo iyada 29 ka mid ah dib loo celiyey oo laga reebay tababarka. Dadkii Nofeembar la qoray waxa ay ka koobnaayeen 650 qof oo qaarkood loo arkayey in ay ahayeen kuwwo aan qaangarrin.

Xafiiska baaritaanka miinooyinka ee Qaramada Midoobay ayaa sameeyey keydka macluumaadka oo loogu talo galay diiwaan gelinta askarta dawladda ku meel gaarka ah. Nidaamka waxa uu ahaa mid ku saleysan qeybinta mushaharka shaqaalaha waxaana ku jiray habka wareysiga afka ah iyo baaritaanka caafimaadka.

Waxaa jiray watbixino lagu kalsoonaan karo oo sheegaya in caruurta loo qortay kooxaha hubeysan ee qabiilada. Kooxaha hubeysan ee raacsan dawladda ku meel gaarka ah, oo ay ka mid yihiin Ahlu Suna Wal Jamaaca waxa ay ka dhinac dagaalamaan ciidamada dawladda waxayna xirtaan dhar isku mid ah.

Bishii Maajo warbixin uu soo saaray wakiilada xoghayaha guud ee UNICEF iyo UN ee caruurta iyo dagaalada ayaa lagu xusay in ay soo kordheyso tirada caruurta ee loo qarto askarta, oo xitaa qaarkood ay da'doodu tahay sideed jir ee goobaha ay Soomaaliya ka mid tahay gaar ahaan dhulka ay gacanta ku hayaan Al-Shabaab. Sida laga soo xigtay Qaramada Midoobay Al-Shabaab waxa ay qorotaa caruurta da'doodu tahay sideed jirka kana qortaan dugsiyada quraanka. Caruurta waxaa inta badan loo adeegsadaa in ay aasaan waxyaabaha qarxa ee lagu aaso hareeraha waddooyinka iyo qalabka kale. Kismaayo, Baydhabo iyo Marka ayaa Al-Shabaab wiilal shan 15 jir ah lagu qasbay in ay dagaalka galaan ama la dili doono.

Kooxda Human Rights Watch waxaa ay sheegeen in Al-Shabaab ay xoog ku qoroto caruurta, iyaga oo caruurta ka qorta dugsiyada quraanka ama marka ay u sii socdaan ama ka soo socdaan dugsiga. Sida laga soo xigtay macluumaad laga helay hay'adda samafalka, caruurta ku jira xeryaha tababarka Al-Shabaab waxaa la mariyaa tababar aad u adag, tababar dhinaca hubka ah, ciqaab jirka ah, tababar xagga diinta ah, waana in ay daawadaan caruur lagu fulinayo xukun dil ah. Al-Shabaab waxa ay caruurta u adeegsadaan in ay ka dhigtaan gabaad waxayna sidoo kale u adeegsadaan dadka is miidaamiya waxaa intaa dheer, Al-Shabaab waxa ay caruurta u adeegsadaan in ay gacan ka geystaan dagaalka sida iyaga oo daabula hubka, biyaha, iyo cuntada; dhaawaca iyo meydka oo ay qaadaan, ururinta sirdoonka iyagoo marmarna noqda ilaalo.

18kii Maarso wasiirka warfaafinta ee dawladda ku meel gaarka ah ayaa sheegay in mid ka mid ah hogaamiyayaasha Al-Shabaab uu qirtay isagoo ka hadlaya salaadda jimcaha in Al Shabaab ay caruurta u adeegsato dagaalka ay kula jirto dawladda ku meel gaarka ah. 12kii Janaayo waxa ay sheegtay in 20 caruur ah oo ka soo goostay Al-Shabaab ay dib ugu celiyeen qoysaskoodii.

## Xadgudubyada Kale ee la Xiriira Dagaalada kale

18 kii Luulyo warbixin ay soo saareen kooxda la socoshada Soomaaliya iyo Eritareeya ayaa ku tilmaamay xaaladda amaanka iyo bini'aadminimo ee soo foodsaarta hay'adaha gargaarka bini'aadminimo ay tahay "mid ka mid tan ugu xun dunida ee ugu adag dunida oo dhan." Qiyaastii 55 dhacdo oo la xiriira amaanka ayaa ku dhacay shaqaalaha gargaarka bini'aadminimo intii u dhaxeysay Janaayo ilaa Agoosto,

Ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo maleeshiyada raacsan ayaa bililiqeystay oo weeciyey gargaarka loogu talo galay dadka ku nool Muqdisho. 21kii Agoosto degmada wadajir ee magaalda Muqdisho waxa ay maleeshiyada raacsan dawladda ku meel gaarka ah weerar ku qaadeen goob lagu qeybiyo cuntada iyagoo bililiqeystay gargaarka cuntada. Ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ayaa hor istaagay maleeshiyada soona celiyey cuntadii. 13kii Luulyo degmada Hodan ee magaalada Muqdisho , ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo xubno ka tirsan dadweynaha ayaa bililiqeystay bakhaarada cuntada gargaarka. 1dii Nofeembar afhayeenka dawladda ku meel gaarka ah ayaa ku dhawaaqay in dawladda ku meel gaarka ah ay shaqadii ka ceyrisay gudoomiyaha degmada Xamar Jajab (Muqdisho) iyo Kaaraan (Muqdisho) taasoo ay sabab u aheyd gargaar maqan ama la bililiqeystay iyo gacan ka hadal loo geystay haaween u yimid in ay gargaarka cuntada qaataan.

Inta badan hay'adaha gargaarka ee caalamiga ah waxa ay ka daad gureeyaan shaqaalahooda ama joojiyeen qeybinta cuntada iyo waxyaabaha kale ee la xiriira gargaarka dhulka ay Al-Shabaab ay gacanta ku hayaan sanadihii hore taasoo ay ugu wacan tahay dilka joogtada ah ee loo geysto, lacagta baadda ah iyo qashqashaadda loo geysto. Warbixin uu soo saaray Gudigga xiriirka ee hay'adaha bishii Oktoobar waxaa lagu sheegay "intii u dhaxeeysay Oktoobar 2008dii ilaa Siteembar 2010 in ilaa tiro gaareysa 18 jeer ay ururada gargaarka bini'aadminimo joojiyeen dhaqdhaqaaqooda taasoo ka timid iyadoo kooxaha hubeysan ay ka eryeen ama faragelin ku sameeyeen barnaamijyadooda. Al Shabaab waxa ay hagardaamo iyo weerar u geysteen shaqaalaha gargaarka ee ku hara iyo hay'adda samafalka iyagoo bililiqeystay gargaarka loogu talo galay dadka gaajada iyo abaaruhuu gaareen. Tusaaale ahaan, 2dii Febraayo Al-Shabaab waxa ay ku soo roogtay canshuur 10 boqolkiiba mushaharka ay qaateen shaqaalaha hay'adda samafalka ee degaanka Marka, iyagoo sheeganaya in lacagataas loo adeegsan doono in lagu caawiyo dadka dhibaateysan.

Hagardaamada loo geysto hay'adaha smafalka waxa ay caqabad ku tahay gaarsiinta cuntada, gaar ahaan koonfurta iyo gobolada dhexe. Hay'adaha gargaarka ee

caalamiga ah ayaa aad ugu xirnaada shaqaalaha Soomalida ah iyo hay'adaha la shaqeeya gaarsiinta gargaarka ay u baahan yihiin.

Tusaaale ahaan, 6dii Luulyo xiligii gurmadka abaarihii ugu darnaa, afhayeenka Al-Shabaab Cali Mohamed Raage "Cali Dheere" ku dhawaaqay in kooxdiisu ay u ogolaaneyso in muslimiinta iyo kuwa aan muslimiinta aheyn ay u ogolaanayaan in ay caawiyaan dadka abaaruhu dhibaatada ka soo gaareen haddii aanay ka laheyn dano gaar ah" 22kii Luulyo Al-Shabaab waxa ay wax ka bedeshay ku dhawaaqidaas iyagoo sheegay in ay hay'adaha iman kara ay yihiin oo kaliya kuwo aan horey looga mamnuucin halkaas. Nofeembar waxa ay Al-Shabaab mamnuucday 16 ka mid ah hay'adaha oo ay ka mid yihiin Hay'adda Qaramada Midoobay Ugu Qaabilsan Qaxooetiga (UNHCR), UNICEF, WHO, UN Tirakoobka Dadka, Xafiiska UNta ee Mashariicda Adeegga, Nabadgelyada Cuntada iyo U Kuurgelidda Nafaqada, Hay'adda Qaxootiga ee Noorway, Hay'adda Qaxootiga ee Denmark, Gargaarka kaniisadaha ee Noorway, Hay'adda Iskaashiga caalamiga ah, Hay'adda Gargaarka Afrika ee Iswidan, Hay'adda Gargaarka ee Jarmalka, Hay'adda Action Contre la Faim, iyo Solidarity and Saacid. Isla mar ahaantaana waxa ay Al-Shabaab xirtay xafiisyada WHO ee Xudur, Bu'aale, Waajid, Beled Wayne,; UNICEF, WHO, xafiisyada hay'addaha samafalka ee Baydhabo; xafiisyada hay'addaha samafalka ee Hiiraan, xafiisyada hay'addaha samafalka ee Marka

15 Diseembar Ururka Laanqeyrta Cas (ICRC) ayaa joojiyey gargaarkii cuntada ahaa ee laga qaadi jirey Muqdisho lana gaarsiin jirey dhulka ay Al-Shabaab gacanta ku heyso. Joojintaasi waxaa looga jawaabayey taliyayaasha Al-Shabaab ee degaanka oo joojiyey gaari lagu waday cuntada gargaarka oo weydiistay inuu baaro shixnadda isaga oo ku andacoonaya inuu baarayo tayada iyadoo ujeedadu tahay in laga qaado lacag baad ah. Kooxda Al-Shabaab ee fadhigeedu yahay Jowhar, gobolka Shabeelada Dhexe waxa ay gacanta ku sii hayeen dhawr gaari oo ay ku rarnaayeen cunto gargaar ah oo Ururka Laanqeyrta cas (ICRC) uu lahaa

Taasi waxa ay ka dhalatay Al-Shabaab oo xayiraad ku soo rogtay gargaarka bini'aadminimo, canshuur ay ku soo rogeen xoolaha nool, iyo jadwalka qeybinta biyaha oo ay ka gaabiyeen qaar ka mid ah dadka degan dhulka ay Al-Shabaab gacanta ku heyso waxay uga qaxeen Kenya iyo Itoobiya iyo xeryaha dadka soo bara kacay ee Puntland, Somaliland iyo dhulka ay dawladda ku meel gaarka ah maamusho ee Muqdisho. Al-Shabaab waxa ay xadiday dhaqdhaqaaqa iyadoo inta badan ku qasabtaa dadka ka qaxaya dhula ay ka taliyaan in ay tagayaan xeryaha dadka soo bara kacay ee ay maamulaan. Al-Shabaab waxaa kale oo ay isku dayday inay joojiso dadka wadanka dibadda uga qaxaya. Dadka ka tagay dhulka

ay Al-Shabaab ka taliso wax yar ayey alaabtoodii ka qaateen, taasoo ay ugu wacan tahay in aanay Al-Shabaab garan in ay qaxayaan. 15kii Oktoobar Al-Shabaabta gobolka Shabeelada Hoose waxa ay ku dhawaaqeen in la xirayo xerada dadka soo bara kacay ee xerada Ala-Yasir ee degmada Afgooye. Al-Shabaab waxaa la soo sheegay in ay ku amartay dadka soo bara kacay in ay dib ugu labtaan guryahoodii gobolada Shabeelada Hoose, Bay iyo Bakool in ay beeraha u beertaan xilliga deyrta. Hay'adaha la shaqeeya UNta waxa ay ku qiyaaseen in ilaa 4,000 oo dadka soo bara kacay lagu qasbay in ay dib ugu laabtaan meelihii ay markii hore ka yimaadeen intii u dhaxeysay 13-18kii Oktoobar.

Dhinaca Somaliland guud ahaan gargaarka bini'aadminimo waxa uu ahaa mid wanaagsan. hase yeeshee, waxaa la soo sheegay weeraro lagu qaaday hantida shaqaalaha gargaarka bini'aadminimo ee qeybo ka mid ah Buuhoodle, gobolka Togdheer, halkaas oo ay dheceeen dagaal dhex maray xoogag ka kala socda qabiilada dega Sool, Sanaag iyo Ceyn. 29kii Maarso koox hubeysan ayaa bililiqeystay cunto gargaar ah oo saarnaa gaadiid ku socday gobolka Sanaag.

## Qeybta 2aad Ixtiraamka Xoriyadda Madaniga ah oo ay ka mid yihiin:

### a. Xoriyadda Hadalka iyo Saxaafadda

### Xoriyadda Hadalka iyo Saxaafadda

Dastuurka ku meel gaarka ah iyo dastuurka Somaaliland waxa ay ogol yihiin xoriyadda hadalka iyo saxaafadda. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu ogol yahay xoriyadda saxaafadda "marba haddii ay suxufiyiintu ixtiramaayaan sharciga" Si kasta arrintu ha ahaatee, suxufiyiintu waxaa la soo dersay gacan ka hadal, xarig, iyo xabsi ku heyn gobolo badan oo dalka ka mid ah. Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed waxa ay soo wariyeen in afar suxufiyiin ah lagu dilay, todoba kalana la dhaawacay, 19 kalana la xiray sanadkan gudihiisa Waxaa kale la soo sheegay in weeraro gacan ka hadal ah loo geystay xarumaha warbaahinta, iyo dhaqan gelinta sharciyo liddi ku ah saxaaafadadda.

<u>Xoriyadda hadalka</u> Dadka deggan dhulka ay gacanta ku heyso dawladda ku meel gaarka ah inta badan waxa ay xor u yihiin in ay dawladda naqdin ku sameyn karaan. Hase yeeshee, afhayeenku waxa uu mamnuucay in baarlamaanku isugu yimaado wax kulana ah muddo afar bilood ah taasoo ay ugu wacan tahay cabsi uu ka qabo in xubnuhu ay doonayaan in ay ka wada hadlaan in wax laga bedelo barnaamijka lagaga baxayo ku meel gaarka. Dadweynaha Somaliland iyo

Puntland waxa ay xor u yihiin in ay sidii ay doonaan wax uga sheegi karaan maamulkooda meel fagaare ah iyo si gaar ahba.

Xoriyadda Saxaafadda Saxaafadda daabacan oo badan oo ka kooban bogag yar oo la badiyey ayaa maalin walba laga soo saaraa magaalooyinka waaweyn. Dhawr ka mid ah maalinlayaasha waa kuwo daabaca naqdin ku jeeda hogaamiyayaasha siyaasadda iyo shaqsiyaadka kale ee magaca dheer leh. Somaliland waxaa ka jiray dhawr wargeys oo madax banaan iyo mid ay dawladdu daabacdo. Waxaa jiray laba wargeys oo ku soo baxa afka ingiriisiga oo todobaadle ah. Waxaa jirey sadex telifishin oo madax banaan iyo mid dawladdu leedahay.

Inta badan dadka Somaliland u dhashay waxa ay wararka ka helaan idaacadaha dibadda gaar ahaan BBCda Soomaaliga iyo tan codka Mareykanka kuwaas oo lagu tabiyo barnaamijyada afka Soomaaliga. Waxaa jirey oo la soo sheegay sideed xarumoood oo FMta iyo mid mowjadaha gaagaaban ah in ay ka hawlgalaaan Muqdisho Xarun raadiye oo ay maalgaliyeen ganacsato degaanka ka hawlgasha koonfurta sida dhawr xarumo FM yaryar oo ka hawlgala qaar ka mid ah dhulka gobolada dhexe iyo koonfurta ee dalka. Sidii sanadihii hore oo kale, maamulka Somaliland waxa uu waday inuu mamnuuco abuuritaanka idaacadaha FM ah oo madaxbanaan. Idaacadda kaliya ee FMta ee Somaaliland waa midda ay dawladdu leedahay. Waxaa ka jira lix raadiye madax banaan oo ka jira Puntland. Al-Shabaab waxa ay gacanta ku hayeen idaacad FM ah oo xarunteedu tahay Kismaayo.

30kii Oktoobar madaxweynaha Puntland waxa uu ku dhawaaqay in ay joojiyeen telefishanka Universal iyo telefishan kale oo Soomaali ah ka dib markii ay khatar ku noqdeen amaanka. 3dii Diseembar maamulka Puntland waxa ay cunaqabateynta ka qaadeeen telefishanka Universal laakiin telefishankii kale ee Soomaaliga ahaa weli lagama qaaadin cunaqabateynta.

Al-Shabaab iyo ASWJ waxa ay xireen xarumo idaacado intii lagu jiray sanadkan. 2dii Juun Ahla Suna Wal Jamaaca (ASWJ) waxa ay weerareen idaacadda Dhuusamareeeb taasoo ka dhalatay ka dib markii idaacaddu ka hadashay khilaaf ku dhex jira madaxdooda. ASWJ ayaa ogolaatay in idaacadda Dhuusomareeb hawada dib ugu soo noqoto wax yar ka dib markii shilku dhacay. 22kii Juun maleeshiyada Al-Shabaab waxa ay weerartay idaacadda Codka Hiiraan iyaga oo xiray shaqaalaha kuna qasbeen inay idaacaddu hawda ka maqnaato muddo shan cisho ah.

<u>Rabshadaha iyo Carqaladeynta</u> Afar ka tirsan shaqalaha warbaahinta ayaa lagu dilay Muqdisho sanadkan gudihiisa (fiiri sidoo kale qeybta 1.g.). Tusaaale ahaan, 18kii Diseembar nin hubeysan oo aan la garaneyn oo ku labisan dharka ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ayaa toogasho ku dilay nin suxufi ah oo caan ah Cabdisalaan Sheekh Xasan "Xiis" magaalada Muqdisho. 13kii Diseembar waxa uu Cabdisalaan filim ka doobay fadhi baarlamaanku yeeshay oo la doonayey in cod kalsooni ah loogu qaado in xilka looga qaado afhayeenka baarlamaanka Sharif Xassan. Ka dib markii barnaamijkaas laga sii daayey telefishanka, waxaa soo gaaray handadaad dil ah. Dawladda ku meel gaarka ah waxa ay balan qaaday in ay baaritaan ku sameyneyso dilkaas. Dawladda ku meel gaarka ah cidina uma aanay xirin ilaa dhamaadkii sanadka.

Shaqaalaha iyo ururada warbaahinta ee Muqdisho ayaa la soo sheegay in xadgudubyo ay u geysteen dawladda ku meel gaarka ah oo ay ka mid yihiin dil, afduub, xabsi ku heyn iyadoo aanay jirin eedeeymo lagu soo oogay iyo dagaal gacan ka hadal ah oo loo geysto qofka iyo hantidiisa. 27kii Maarso ciidamada nabadgelyada ee dawladda ku meel gaarka ah waxa ay xireen maamulaha idaacadda Shabeele, Cabdirashiid Cumar Qase iyo Maamulaha cusub ee Cabdi Maxamed Ismaaciil (Cuud) iyadoo lagu xiriirinayo booqashada madaxweynaha dawladda ku meel gaarka ah Sheekh Shariif uu ku tagay dhulkii ay ka baxeen xoogagga Al-Shabaab. Dawladda ku meel gaarka ah ayaa sheegatay in ay xirtay wariye la "sheegay inuu sii daayey warar aan xaqiiqo aheyn oo ku saabsan amaanka xaladda Muqdisho oo khatar ku ah nabadgelyada qaranka." 30kii Maarso ayaa dawladdu sii deysay weriyahaas ka dib markii uu u cudurdaartay wasiir ku xigeenka warfaafinta.

Ciidamada Somaliland aya xiray oo garaacay suxufi (arag qeybaha 1.b iyo 1.e). Tusaaale ahaan, 19kii Sibteembar wax ay garaaceen oo muddo xabsi ku ahyeen tafatiraha wargeyska *Saxafi* Mustafe Sheekh Cumar Geedi ka dib markii uu sawir ka qaaday dad iska caabinaya dawladda oo xoog kaga saareysay xaafadda Goljano ee Hargeysa. 27kii Oktoobar sida laga soo xigtay Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed, ciidamada nabadgelyada ee Hargeysa ayaa garaacay Maxamed Cabdi Kaahin "Boosh" oo ka tirsanaa shaqaalaha Ramaasnews iyo telefishanka madax banaan ee Royaltv ka dib markii uu sawiray dad dibadbax sameynayey.

Puntland waxa ay sii waday carqaladdda ay ku heysay shaqaalaha warbaahinta, iyadoo xiritaankooda sabab looga dhigay sababo la xiriira sugitaanka amaaanka gobolka (arag qeybta 1.a.) Tusaaale ahaan, 15kii Nofeembar ciidamada nabadgelyada Puntland ayaa weeraray iyaga oo aan haysan ogolaansho maxkamadeed guriga sawir qaade u shaqeeya telefishin Soomaaliyeed Mahad

Cabdi Cali ee Garoowe iyo wariye Saciido Kiin Axmed Jaamac. Waxaa Mahad Cabdi Cali la geeyay saldhiga booliiska si su'aalo loo weydiiyo. Saciido Kiin Axmed Jaamac oo sii ogaatay weerarka xili hore waxa ay gashay dhuumaaleysi intii aan weerarka lagu qaadin. Labaduba waxa ay ka soo warameen shir qabiileed ka dhacay Taleex, gobolk Sool ka dib markii telefishinkaas loo diiday inuu ka hawlgalo dhulkaas. Maamulku waxa uu damaanad lacageed ku sii daayey Mahad Cabdi Cali 16kii Nofeembar taasoo ay dhigeen Ururka Suxufiyiinta Puntland.

Suxufiyiinta waxaa lagu weeraraa oo lagu dhaawacaa gobolka Puntland. Tusaaale ahaan, 26kii Agoosto weerar bambada gacanta ah ayaa lagu tuuray raadiye si gaar ah loo leeyahay ee Daljir kaas oo uu ku dhaawacmay mid ka mid ah ilaalada raadiyaha dhaawacna uu soo gaaray idaacadda. 18kii Oktoobar qof aan la garaneyn ayaa ku tuuray bambada gacanta xarunta Raadiyo Gaalkacyo.

Bishii Nofeembar ee 2010kii madaxweynaha Puntland ayaa cafis u fidiyey Cabdifataax Jaamac Mire oo madax ka ahaa warbaahinta Horseed. Ciidamada Puntland ayaa xiray bishii Agoosto 2010 ka dib markii uu wareysi ka qaatay mid ka mid ah hogaamiyayaasha kooxaha xag jira.

Al-Shabaab iyo kooxaha xag jira ayaa iyagana carqalad ku haya shaqaalaha warbaahinta. Waxaa la soo sheegay in shaqaalaha warbaahinta ay Al-Shabaab ugu hanjabtay in ay dili doonaan haddii aanay wax wanaagsan ka sheegin weerarada ay Al-Shabaab kaga soo horjeeda dawladda.

Ma jirin warar sheegaya dad loo xiray dilal hore oo loo geystay ama la isku dayey in loo geysto shaqalaha warbaahinta.

Faafreebka iyo Xakameynta Waxyaabaha La Qorayo. Shaqaalaha warbaahinta ayaa dhaqan geliyey faafreeb u gaar ah si ay uga badbaadaan aarsasho kaga timaada dawladda iyo Al-Shabaab. Al-Shabaab waxa ay mamnuuceen shaqaalaha warbaahinta ee wariya waxyaabo liddi ku ah "sharceecada Islaamka" sida ay iyagu u tarjumaan waxayna u sheegeen dadka degan degaanada ay gacanta ku hayaan in aan loo ogoleyn dhagaysiga wararka caalamiga ah sida BBCda iyo Codka Mareykanka.

Sharciyadda Qoraalka/Amaanka Qaranka: dawladda ku meel gaarka ah iyo Puntland labaduba waxa ay soo xigtaan amaanka qaranka si ay cudurdaar ugu helaan in ay caburiyaan naqdinta lidiga ku ah. Tusaaale ahaan intii uu socday shir uu saxaafadda u qabtay madaxweynaha Puntland waxa uu suxufiyiinta ugu

hanjabay inuu xiri doono haddii ay sii daayaan warbixino liddi ku ah maamulkiisa oo loo arko in ay khatar ku yihiin nabadgelyada Puntland.

Maamulka Somaliland waxa uu maxkamad ku qaaday suxufiyiin lagu eedeeyay inay jabiyeen sharciyada qoraalka. Tusaaale ahaan, 23kii Janaayo maxkamadda Hargeysa ayaa ku xukuntay tafatiraha *Waheen* Maxamuud Cabi Jaamac sadex sano oo xariga ah iyo ganaax ka dib markii uu qoray warar ku saabsan qof madax ka ah shirkadda korontada oo shaqada qoraya qoyskiisa oo kaliya.

Saraakiisha sare ee Somaliland iyo wasiirada ayaa la soo sheegay in ay caburiyaan suxufiyiinta ka dib marka ay wax ka qoraan musuqmaasuqa ay sameeyaan. Tusaaale ahaan bishii Diseembar ee 2010kii Xirsi Cali oo markii dambe noqday wasiir ka tirsan golaha wasiirada (oo ahaa wasiirka madaxtooyada dhamaadkii sanadka) ayaa ku eedeeyay *Hargeisa Star* iyo tafatiraheeda Xasan Maxamed Yuusuf in ay daabaceen warar sheegaya kharash badan oo dheeraad ah oo ku baxay booqashadii uu madaxweynaha Somaliland ku tagay London. Maamulka Somaliland waxa uu u yeeray Xasan Yuusf oo muddo gaaban xarig ku hayey; iyadoo Xirsi Cali uu ka noqday dacwad uu ku soo oogay wargeyska iyo tafatirihiisa.

<u>Raaddka aanay dawladdu ku laheyn</u>: Al-Shabaab waxa ay mamnuucday xoriyadda hadalka, oo ay ka mid tahay saxaafadda.

**Xoriyadda Shabakadda Internetka**

Ma jiraan xayiraad dawladdu ku soo rogtay helitaanka shabakadda internetka, hase yeeshee, kooxaha xag jira waxaa laga soo sheegay in ay si hoose dabagal ugu sameeyeen shabakadda internetka oo la aaminsan yahay in qorayaal is qariyey iimayl handadaad ah u soo direen shaqaalaha warbaahinta ee degaanka.

Hal dhacdo ayaa laga soo sheegay Puntland oo xabsiga loo taxaabay qof ka tirsan suxufiyiinta barta shabakadda internetka. 28 Juun waxa ay ciidamada nabadgelyada soo xireen Faysal Maxamed Xasan "Boston" oo u soo warami jirey bogga internetka ee "Hiiraan Online" ka dib markii uu sheegay in laba qof oo meydkooda laga helay duleedka Boosaaso ay ahaaayeen saraakiiil ka tirsan ciidamada Puntland. Maxkamad Puntland ka tirsan ayaa 2dii Luulyo ku xukuntay xabsi sanad ah "daabacaadda warar been ah." Madaxweynaha Puntland ayaa cafis u fidiyey isaga iyo 90 kale oo maxaabiis ah 31kii Luulyo taasoo qeyb ka aheyd dabaaldagii loo sameeyey sanadguuradii 13aad ee asaaska puntland.

**Xoriyadda Aqoonta iyo DhacdooyinkaDhaqanka.**

Aqoonyahanada waxaa lagu soo rogay faafreeb. Maamulka Puntland waxa uu waajib kaga dhigay dadka doonaya in ay sameeyaan cilmibaaris in ay ogolaasho ka heystaan dawladda. Sanadkan gudihiisa ma jirin wax weeraro ah in lagu qaaday dugsiyada caruurtu dhigtaan, macalimiinta iyo dugsiyada.

Marka laga reebo dhulka ay gacanta ku hayaan Al-Shabaab, ma jirin xayiraad rasmi ah oo lagu soo rogay ka qeyb galka xafladaha dhaqanka, miyuusigga ama aadista shineemooyinka. Xaaladda nabadgelyada ayaa ka dhigtay mid xadideysa abaabulka xafladaha dhaqanka ee gobolada dhexe iyo koonfurta dalka. Xaflad dhaqameed uu soo abaabulay maamulka Banaadir ee Muqdisho ayaa waxaa hor istaagay maleeshiyo raacsan duqii hore ee magaalada oo rasaas ku furay dadkii isu soo baxay iyadoo ay dhinteen kuna dhaawacmeen dhawr qof (arag qeybta 1.a). dhulka ay ka taliso Al-Shabaab, heesaha iyo kubadda cagtaba waa la mamnuucay.

**b. Xoriyadda Dibad baxa iyo Isu Imaatinka.**

**Xoriyadda Dibad baxa**

Dastuurka ku meel gaarka ah iyo dastuurka Somaaliland waxa ay ogol yihiin xoriyadda hadalka iyo saxaafadda. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland waxa uu xadidayaaa xaqa isu imaatinka, oo ay ka mid tahay mamnuucidda laakiin loo arkay inuu ka soo horjeedo sharciyada aasaaska u ah Islaamka, ama caaafimaadka dadweynaha, amaanka qaranka ama sharafta qofka. Amaan darada ka jirta darteed ayaa xadidaysa meelaha qaarkood.

Dawladda ku meel gaarka ah waxa ay xadiday isu imaatinka dad ayaana lagu dilay sanadka gudhiisa. 10kii Juun ka dib markii la saxiixay heshiiskii Kambala, ciidamada dawladda ku meel gaarka ah waxa ay rasaas ku fureen dad banaanbax isugu soo baxay oo ka soo horjeeda madaxweyne Shariif iyo afhayeenka baarlamaanka waxaana ku dhintay sadex qof.

14kii Abriil maaamulka gobolka Banaadir ayaa mamnuucay isu soo baxa dadka ay isu soo baxaan ee Muqdisho haddii aanay ogolaasho ka heysan ciidamada nabadgelyada ee gobolka. Isla mar ahaantaa , waxaa la soo sheegay in dawladda ku meel gaarka ah ay lacag siisay dad dibadbax ka hor dhigay goob ay kulan ku lahaayeen guddi qaramada midoobay ah oo u xilsaaran arrimaha Soomaaliya oo lagu qabtay Nayroobi, Kenya. 15kii Abriil waxa uu xoog ku hor istaagay dad

dibad bax isu diyaarinayey ay ku taageerayaan shirka wada tashiga ee gudiga qaramada midoobay ee u xilsaaran arrimaha Soomaaliya.

Al-Shabaab ma aysan ogolaan isu soo ururka nooc kasta oo u yahay iyada oo aan ogolaansho looga helin maleeshiyadooda.

**Xoriyadda Isu Imaatinka.**

Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu ogol yahay xoriyadda isu imaatinka mana jiraan warbixino sheegaya dawlada ku meelgaarka ah inay mamnuuceen ama ay xayireen isu imaatinka. Dadka degan goobaha ka baxsan dhulka ay Al-Shabaab gacanta ku heyso goblada dhexe iyo koonfurta waxa ay si xor ah ugu biiri karaan hay'adaha madaniga ah iyaga oo xooga saaraya arrimo dhawr ah. Hay'adaha madaniga ah guud ahaan dadka Soomaaliyeed aad bay ixtiraam ugu hayaan awoodda ay u leeyihiiin in ay u fidi karaan dadweynaha adeegga ay u baahan yihiin gaar ahaan goobaha aanay dawladdu ka hawlgelin.

Dastuurka Somaaliland waxa uu ogol yahay xoriyadda isu imaatinka xuquuqdaas oo guud ahaan si dhab ah loo ixtiraamo. Hase yeeshee, maamulka Somaliland waxa ay hay'adaha madaniga ah ka hor istaagtay ka qeybgalka shirarka la xiriira dawladda ku meel gaarka ah taasoo ay u aragtay in ay dibindaabyo ku tahay qaranimada Somaliland.

Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland waxa uu mamnuucayaa ururo si qarsoodi ah loo abuuro oo qaab milatari leh, qaab qabiil ku dhisan, ama liddi ku ah "danaha qaranka" Qaar ka mid ah xubnaha hay'adaha madaniga ah ayaa sheegaya in la socoshada waxyaabaha ay qabanayaan ay tahay mid aad u korodhay sanadkan. Maamulka Puntland waxa uu hay'adha madaniga ah ka mamnuucay in ay ka qeyb qaataan waxyaabaha la xiriira qoritaanka dastuurka ku meel gaarka oo ay ka mid yihiin talo siinta habka loo qorayo ama dhaqdhaqaaqa hay'adaha madaniga ah.

**c. Xoriyadda Diinta**

Arag *warbixinta Caalamiga ah ee Xoriyadda Diinta* ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda www.state.gov/j/drl/irf/rpt.

**d. Xoriyadda Dhaqdhaqaaqa Dadka Soo Bara Kacay, Ilaalinta Qaxootiga, iyo Dadka Aan Dal Lahayn.**

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah wxa uu damaanad qaadayaa in dadku ay si xoriyad ah isaga gooshi karaan dalka gudihiisa. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland waxa uu dhigayaa in gelitaanka meelaha qaarkood la xadidio. Dastuurka Somaliland waxa uu dhigayaa in muwaadiniintu ay tagi karaan halkii ay doonaan waddankana ku soo noqon karaan haddii ay doonaan, una hogaansamaan sharciga. Dhab ahaantii xoriyadda isu socodka waa mid xaddidan qeybo waddanka ka mid ah.

Dhaqdhaqaaqa waddanka gudihiisa ah Baraha kontaroolada ee ka dhashay xaaladda maamul la'aanta ee ka jirta goobaha ay maamulaan maleeshiyooyinka hubeysan, kooxaha qabiilada, kooxaha raacsan dawladda ku meel gaarka ah, Al-Shabaab iyo kooxaha raacsan dadka degaanka waxa ay dhaxalsiiyeen bililiqeysi, baad iyo xadgudub ay la kulmaan bulshada rayidka. Waxaa jira baro kontarool oo aan sharci aheyn oo ay maamulaan qabqablayaasha dagaalka oo lagu arkay Muqdisho ka dib markii ay Al-Shabaab dib uga gurteen magaalada Muqdisho 6dii Agoosto.

Dibad u Safarka: Dad yar ayaa heli kara baasaboorada safarka. Marka la fiiriyo baasaboorada been abuurka ah ee tirada badan, qaar ka mid ah dawladaha ajnabiga ah ma aqoonsana baasaboorka Soomaaliga inuu yahay mid lagu safri karo.

**Dadka soo bara kacay (IDPs).**

Xaaladda gargaarka bini'aadminimo waa mid aad u sii xumaatay marka lala barbardhigo sanadii hore. Hay'adda Arrimaha Qaxootiga U Qaabilsan Qaramada Midoobay (UNHCR) waxa ay ku qiyaastay in ay jiraan dadka soo bara kacay gudaha dalka ay gaarayaan 1.36 milyan. Dagaalada, abaaraha, iyo gaajada waxa ay sanadkan sababeen in ay sii socoto dadka soo barakacay aad u kordhay. Qaramada Midoobay waxa ay ku dhawaaqday lix goobood oo ay gaajo ba'an ka jirto gobolada dhexe iyo koonfurta Soomaaliya; sadex ka mid ah ayaa laga saaray dhamaadkii sanadka. Ilaa dhamaadkii sanadka 955,000 qof ayaa ka qaxay waddanka una qaxay wadamada deriska ah ee gobolka. Qaar badan oo ka mid ah dadka soo bara kacay ma heystaan adeegga aasaasiga ah, waxayna intooda badan degeen inta u dhaxaysa Muqdisho iyo Afgooye ee Shabeelada Hoose. Xaaladda abaaraha ee gobolada dhexe iyo koonfurta waxa ay kordhiyeen tirada dadka u soo bara kacay ee Puntland, Galmudug iyo Somaliland intii lagu jiray sandkan.

Waxaa jiray sharciyo iyo nidaam la raaco oo lagu ilaalinayo dadka soo barakacay sida ku xusan mabaadi'da Qaramada Midoobay ee dadka soo bara kacay gudaha dalka. Maamulka dawladda ku meel gaarka ah, Somaliland iyo Puntland waxaa y

u fidiyeen gargaar iyo badbaadin dadka soo bara kacay, inkastoo gurmadka dawladda ku meel gaarka ah aanu aheyn mid taabogal ah ayna ugu wacan tahay kheyraadka oo kooban iyo isku xirka oo aan wanaagsaneyn.

18kii Luulyo warbixin ay soo saareen Kooxda la Socoshada Arrimaha Soomaaliya iyo Erateriya ee Qaramada Midoobay ayaa ku tilmaamay xaaladda nabadgelyada iyo gargaarka bini'aadminimo ee hay'adaha ka hawlgala Soomaaliya tahay "mid ka mid ah kuwa ugu khatarsan oo hor istaaga dunida oo dhan" (arag qeybta 1.g.). Ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo maleeshiyada raacsan ayaa bililiqeystay oo weeciyey gargaarka loogu talo galay dadka ku nool Muqdisho. Inta badan hay'adaha gargaarka ee caalamiga ah waxa ay ka daad gureeyaan shaqaalahooda ama joojiyeen qeybinta cuntada iyo waxyaabaha kale ee la xiriira gargaarka dhulka ay Al-Shabaab ay gacanta ku hayaan sanadihii hore taasoo ay ugu wacan tahay dilka joogtada ah ee loo geysto, lacagta baadda ah iyo qashqashaadda loo geysto.  Bishii Nofeember waxa ay Al-Shabaab mamnuuceen 16 ka mid ah hay'adaha gargaarka iyo wakaalado.   Al-Shabaab waxa ay xadiday dhaqdhaqaaqa iyadoo inta badan ku qasabtaa dadka ka qaxay dhulka ay ka taliyaan in ay tagaan xeryaha dadka soo bara kacay ee ay maamulaan.  30 kii Oktoobar weerar ay ciidamada cirka ee Kenya ku qaadeen magaalada Jilib ee Jubada Dhexe waxa uu gantaal ku dhacay xero ay degan yihiin dad soo barakacay.  Sida laga soo xigtay Dhakhaatiirta aan Xuduudda Laheyn, waxa ay sheegeen in gantaalkaas dilay shan qof ayna ku dhaawacmeen 45 qof oo intooda badan ay caruur iyo dumar ahaayeen (arag qeybta 1.g.)

Rabshadaha ku saleysan kala duwanaashaha Jinsiga, oo ay ka mid tahay xadgudubka galmoodka ee loo geysto dadka soo bara kacay, Muqdisho arrintasi dhibaato balaaran bay aheyd , gaar ahaan maleeshiyada raacsan dawladda ku meel gaarka ah ee lagu eedeeyo in ay yihiin kuwa geysta xadgudubka noocas ah (arag sidoo kale qeybaha 1.a, 1.g, iyo 6, Dumarka).   Tusaaale ahaan, 21kii Agoosto waxaa la soo sheegay in ciidamada dawladda ku meel gaarka ah ay kufsi ka geysteen xerada Badbaado.   Cilmi baarayaal ka socda Ururka Xuquuqda Aadanaha ee Dunida ayaa diiwaangeliyey in ay jiraan caddeymo la taaban karo oo muujina in maleeshiyada degmada ee mas'uulka ka ahaa nabadgelyada Badbaado ay geysteen xadgudubka galmoodka.   Qaramada Midoobay waxa ay aaminsan tahay rabshadaha sii kordhaya inay ugu wacan tahay ciidamo badan oo aan diiwaan gashaneyn, aan la siin wax lacaga ah, laheyn tababar ku fialn ay mas'uul ka yihiin nabadgelyada xeryaha.   Hay'adaha samafalka ee degaanka ayaa sheegay in musqulaha xeryaha dadka soo bara kacay ay tahay goobaha ay ka dhacaan xadgudubka galmoodka.  Kuwa sharciga jabiya inta badan laguma ciqaabo xadgudubyada.

Maamulka Banaadir ayaa qiray in ay kordhayso tirada rabshadaha la xiriira galmoodka ee xeryaha Muqdisho iyadoo ay ugu wacan tahay nabadgelyada ka jirta degaanka hoyga dadka soo bara kacay iyadoo aanay jirin maalgelin kiu filan. 25kii Oktoobar iyadoo laga jawaabayo cadaadiska bulshada caalamiga ah, ayaa Ra'iisul Wasaarraha dawladda ku meel gaarka ah waxa uu ku dhawaaqay guddi u xil saaran wax ka qabashada rabshadaha ku saleysan jinsiga kala duwan kaasoo hoos yimaada xafiiska ra'iisul wasaaraha. Waxaa xigay inuu magacaabay sarkaal u xilsaaran arrintan laakiin qaab dhismeedkaas ilaa dhamaadkii sanadkan lama dhaqan gelin.

Waxaa jiray warbxino baahsan oo sheegaya in ciidamadu ay geysteen burcadnimo iyo xadgudubka galmoodka ah ee haweenka ka safraya Soomaaliya ee u socda xeryaha qaxootiga ee Itoobiya iyo Kenya. Dhawr dumar ah ayaa soo sheegay in Al-Shabaab ay u geysteen rabshado taasoo qeyb ka ah cabsi gelin ay doonayaan in ay ku joojiyaan haweenka in ay gaaraan qaxootiga iyo degaanka dadka soo bara kacay iyo cawaaqibta ka dhalan karta dhulka ay Al-Shabaab baneeyeen.

Maamulka Puntland waxaa uu si teelteel ah ula yimaadaa xoog ku celin uu dib ugu celiyo dadka aan u dhalan gobolada koonfurta iyo dhexe ee ka soo jeeda gobolada Bay iyo Bakool. Maamulka Puntland waxa uu xiray dad lagu qiyaasay 400 oo dhalinyaro ah oo ka soo jeeda gobolada dhexe iyo koonfurta oo lagu tuhunsan yahay in ay qeyb ka yihiin kooxda Al-Shabaab ama ay u soo haajireen sababo dhaqaale halkii ay ahaan lahaayeen dad soo bara kacay. Sida laga soo xigtay xafiiska Hay'adda Arrimaha Qaxootiga U Qaabilsan Qaramada Midoobay (UNHCR) in ka badan 1,500 oo qof oo ah dadka u soo bara kacay ee koonfurta iyo dhexe ay ku jireen xabsiyada Puntland sanadkii 2011kii.

Al-Shabaab ayaa hor istaagtay Soomaali isku dayeysay in ay gaaraan xeryaha dadka soo bara kacay ee dhulka ay gacanta ku heyso dawladda ku meel gaarka ah iyo xeryaha qaxootiga ee Kenya iyo Itoobiya. Al-Shabaab waxa kale oo ay ku qasabtay dadka ku dhaqan dhulka ay gacanta ku heyso in ay u guuraan baadiyaha oo ay ka shaqeeyaan beeraha Al Shabaab.

## Badbaadinta Qaxootiga

Hay'adda Arrimaha Qaxootiga U Qaabilsan Qaramada Midoobay (UNHCR) waxa ay sheegtay in 2,113 qaxooti ah iyo 5,850 magangalyo doon ah ay ku noolaayeen Soomaaliya. Intooda badan waxa ay ahaayeen dad ka soo jeeda Oromo iyo

Ogaadeen ee dhulka Itoobiya soona galay waddanka intii u dhaxeysay 1996kii ilaa 2000.

Loo ogol yahay magangalyo doonka  Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa magangalyo doonka siyaasadeed in loo ogolaado dadka ka soo carara dalkooda ama dal kale sababo la xiriira in maxkamad lagu soo taago siyaasadda, diinta ama dhaqanka.  Hase yeeshee, ma jiro nidaam rasmi ah oo damaanad qaadaya ilaalintaas.  Maamulku waxa uu damaanad qaaday qaar ka mid ah ilaalinta xuquuqda sida isaga oo hor istaagay ceyrinta ama dib u celinta qaxootiga dib loogu celiyo dalalka lagu cabsi geliyo iyadoo si dhab ah ay dawladdu u aqoonsatay xaalad qaxootinimo ama magangalyo doonimo.  Somaliland waxa ay joojisay diiwaan gelinta dadka magan gelyo doonka ah   Sida laga soo xigtay Hay'adda Arrimaha Qaxootiga U Qaabilsan Qaramada Midoobay (UNHCR) tiro aan la garaneyn oo ka ah dad ka soo jeeda Itoobiya ayaa magangalyo doon ahaan ku jooga Somaliland.

Dib u celinta:   4tii Siteembar wasiir ku xigeenka arrimaha gudaha ee Somaliland ayaa amray in dadka ajaanibta ah ee sharci darada ku degan Somaliland ay kaga baxaan dalka muddo 30 cisho gudahood ah.   Wasiirku waxa uu intaa ku daray in aanu amarkaas khuseyn dadka ka soo cararay dagaalada ee ka soo jeeda gobolada dhexe iyo koonfurta.    Amarkaas waxaa loo arkayey in loola jeedo oromada iyo dadka u dhashay Itoobiya.   hay'adaha gargaarka ee caalamiga ah ayaa ku qiyaasay in dadka aan diiwaan gashaneyn ee u dhashay Itoobiya ee ku sugan Somaliland oo amarkaasi uu saameynta ku yeelanayo lagu qiyaasay 15,000 ilaa 818.000.  Iyaga oo filaya in xoog looga saaro waddanka, qaar badan oo qaxootiga ka mid ah ayaa u guuray magalooyinka xuduuda Itoobiya ku dhow dhow.

28kii Diseembar waxa ay Somaliland ku soo celisay Itoobiya 15 qof oo ah qaxooti diiwaan gashan iyo shan oo ah magangalyo doon taasoo Human Rights Watch u aragtay jabin sharciyada caalamiga ah ee mamnuucaya dib u celinta.    22kii Diseembar ciidamada nabadgelyada ayaa xirxiray dad qaxooti ah oo wakiilo ka ahaa qaxootiga oo kulan la lahaa saraakiisha wasaarada arrimaha gudaha Somaliland.  Waxa ay ka doodayeen in 1,000 qof oo Itoobiyaan ah la isugu geeyo dhisme lagu hayo oo ay maamulaan hay'adda samafalka ee qaxootiga iyo dadka soo haajira ee ka hawlgala Hargeisa.

## Qeybta 3aad Ixtiraamka Xuquuqda Aadanaha: Xuquuqdaas Dadka Dalka u Dhashay iyo Bedelidda Dawladda

Hay'adaha dawladda ku meel gaarka ah waxa ay ku fashilantay in ay horumar ka samayso hawlihii loo xilsaaray ee muhimka u ahaa u guurista dawlad dhexe oo dadku doortay. Gobolada koonfurta iyo dhexe waxa inta badan gacanta ku hayey kooxda Al-Shabaab. Dastuurka Somaliland waxa uu dhigayaa in muwaadiniintu ay xaq u leeyihiin in ay dawladooda ku bedeli karaan si nabadgelyo ah dhab ahaana dadku way isku dayeen in ay sidaa sameeyaan. Dastuurka Puntland waxa uu dhigayaa in muwaadiniintu ay xaq u leeyihiin in ay bedeli karaan dawladooda si nabadgelyo ah; hase yeeshee taasi dhab ahaan uma dhicin mana aanay jirin doorashooyin si toos ah loogu soo doortay wakiilada Puntland.

**Doorashada iyo Ka Qeyb Qaadashada Siyaasadeed.**

Doorashooyinkii dhawaanta la qabtay Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxaa markii hore loogu talo galay muddo shan sano oo ku dhamaaneysa 2009kii. baarlamaanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka, sida ku xusan heshiiskii Jabuuti, waxa uu mudadaas ku daray laba sano ilaa 2011. Doorashada madaxweynaha iyo afhayeenka barlamaanka oo dhici laheyd 2011 ma aanay dhicin. 3dii Febraayo baarlamaanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka waxa uu wax ka badalay dhawr qodob oo ka mid ah dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxaana lagu kordhiyey sadex sano ilaa Agoosto 2014, inkastoo bulshada rayidka iyo gobolada/hay'adaha siyaasadeed ay soo jeediyeen wax ka bedelka baarlamaanka iyo doorashooyinka.

9kii Juun hogaamiyayaasha gobolada waxa ay taageereen "heshiiskii Kambaala" ee dhex maray madaxweynaha iyo afhayeenka baarlamaanka oo ay ka mid ahaayeen dib u dhigidda doorashooyinka ilaa Agoosto 2012, magacaabidda Ra'iisul Wasaarraha cusub iyo qabashada shir la tashi ah oo lagu afjarayo xilliga kala guurka. 28kii Juun Cabdiwali Maxamed Cali ayaa lagu bedelay Maxamed A Maxamed "Farmaajo" inuu noqdo ra'iisul wasaaraha iyadoo 23kii Luulyo la magacaabay gole wasiir oo cusub. Wakiilo ka socda Hay'adaha dawladda ee ku meelgaarka, Puntland, Galmudug, Kooxda Ahlu Suna Wal Jamaaca, ayaa kulan ku yeeshay Muqdisho kaasoo ahaa"kulan wada tashi ah oo aad u sareeya" halkaas oo ku ogolaadeen barnaamijka lagu soo afjarayo dawladda ku meel gaarka ah Sibteembar 6deeda. Barnaamijkaas waxaa ku jira hawlo kale oo loo xilsaaray oo la doonayo in la dhameystiro inta ka horeysa bisha Agoosto 2012ka oo ay wehliyaan qaabka dhaqan gelinta iyo kor kala socoshada.

13kii Diseembar 2012 xubno ka tirsan baarlamaanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka ayaa u codeeyay cod kalsoonida lagaga qaadayo afhayeenka baarlamaanka Sharif Xasan. Hase yeeshee, dawladda ku meel gaarka ah, Shariif

Xasan, Ururku Midowga Afrika iyo Hay'ada u Dhaxeysa ee Horumarinta (IGAD) waxay u arkeen jabin heshiiska kambaala handadaad xilka lagaga qaadayo madaxweynaha, afhayeenka baarlamaanka, iyo ku xigeenadiisa iyo kala diridda baarlamaanka. Waxa kale oo ay su'aal ka keeneen in codka baarlamaanku qaaday uu waafaqsan yahay nidaamka u degsan baarlamaanka. Xubnaha baarlamaanku waxa ay ku doodeen, dhinaca kale, in dastuurka federaalka oo heshiiska Kambala oo loo aqoonsan yahay sharciyada ugu sareeya Soomaaliya, uu u ogolaanayo in ay xilka ka qaadi karaan afhayeenka baarlamaanka. Dhamaadkii sanadka Sharif Xasanwaxa uu ahaa afhayeenka baarlamaanka.

Al-Shabaab waxa ay u diiday dadweynaha ku nool dhulka ay gacanta ku heyso ka qeyb qaadashada qaab dhismeedka dawladda ama wax ka bedelidda maamulka Al Shabaab. Qaar ka mid ah maamulka Al-Shabaab, hase yeeshee, waxa ay ka talo galiyeen oday dhaqameedyada haddii ay jiraan waxyaabo dhibaato ah oo gaar ah waxayna u ogolaadeen in ay hawlahooda sii wataan oo ay sii jiraan.

Somaaliland waxa ay leedahay dastuur iyo gole baarlamaan oo ka kooban laba aqal oo wakiilada qabiilada ee ku jira isu dhigmaan iyo iyada oo la doortay madaxweyne iyo madaxweyne ku xigeen.

Doorashada madaxweynaha Somaliland waxaa la qabtay Juun 2010 doorashadaas oo korjoogayaasha caalamiga iyo guduhuba ku tilmaameen mid si cadaalad ah u dhacday. Sharciyada Somaliland waxa ay dadka u dhashay ka hor istaagayaan ka qeyb qaadashada hay'adaha dawladda dhexe, qoritaanka dastuurka ku meel gaarka ah ama ka qeybgalka kulamada lagu soo dhameynayo xilliga ku meel gaarka ah. Bishii Nofeembar wakiilada aqalka hoose ee Somaliland waxa ay wax ka bedeleen sharciyadii doorashada madaxweynaha iyo doorashada degaanka ee sanadkii 2001 iyagoo wax ka badalay da'da ugu yar ee looga qeyb qaadan karo doorashada oo aheyd 35 sano ka dhigay 25. 13kii Diseembar madaxweynaha Somaliland ayaa saxiixay sharciga wax laga bedelay.

Puntland waxa ay 1998kii caddeysay maamul goboleed laga dhisay gobolka shir wada tashi ah oo dhex maray wafuud ka kala socday lix gobol oo ay ka mid yihiin oday dhaqameedka bulshada, hogaamiyayaasha ururada siyaasadeed, xubnaha maamulada golaha degaanka, maamulka gobolada, wakiilada ururada bulshada rayidka ah. Puntland waxaa ka dhisan gole baarlamaan oo ah laan ka mid ah goloaha shacabka laguna magacaabo golaha odayaasha. Sanadkii 2009kii waxa uu goluhu doortay Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud "Faroole" inuu noqdo madaxweynaha Puntland. Wakiilada golaha baarlamaanka ayaa qeybsaday kuraasta iyaga oo wakiilo ka ah odayaasha qabiilada oo ka kala socda maamulada

lixda gobol iyadoo wakiilo 66 xubnood ah oo gudiga doorashada Puntland ku dhawaaqay bishii Diseembar 2008dii ay weli sii joogeen xafiisyada.

Xisbiyada Siyaasadeed  Ma jirin xisbiyo rasmi ah oo ka jira gobolada  dhexe iyo koonfurta.

Bishii Janaayo wakiilada gudiga doorshada qaranka ee Somaliland oo ka kala socda sadexda xisbi ee ka diiwaan gashan, bulshada rayidka ah, iyo dad magac dheer ku leh bulshada ayaa bilaabay in ay ka doodaan in la la ogolaado furitaanka xisbiyo dheeraad ah.    20 Agoosto madaxweynaha Somaliland waxa uu saxiixay sharci lagu mamulo ururada siyaasadeed iyo sharciyada xisbiyada.   4tii Siteembar waxa uu soo gudbiyey magacyada todobada qof ee gudiga diiwaan gelinta ururada siyaasdeed iyo ogolaashaha xisbiyada qaranka ee wakiilada Aqalka Odayaasha oo ogolaada magacyada.  Iyada oo waajib ka dhigeysa shan, hawsha ay gudigu u xilsaaran yihiin waxaa ka mid ah diiwangelinta xisbiyada cusub si ay uga qeyb qaataan, iyaga oo garab carararaya xisbiyada jira, iyagoo kula tartamaya oo kala qeyb qaadanaya doorashooyinka loogu talo galay in ay dhacaan bisha Abriil 2012.

Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland waxa uu xadidayaa tirada xisbiyada ilaa sadex xisbi isagoo gooya sharciyada ku saabsan barnaamijka xisbiyada, maalgelintooda, iyo dastuurka la doonayo in ay u hogaansamaan. 12kii Luulyo barlamaanka Puntland waxa uu ogolaaday magacaabidda gudiga doorashada ee ku meel gaarka ah.   Hawsha gudiga loo xil saaray waxaa ka mid ah diiwaan gelinta xisbiyada ka qeyb qaadanaya gudiga horudhaca ee doorashooyinka degmooyinka ee sanadka 2013.

Ka qeyb qaadashada dumarka iyo dadka laga tirada badan yahay:  Barnaamijka looga baxayo xilliga kala guurka 6da Sibteembar waxa uu si gaar ah uga yeerayaa haweenka ka qeyb galka iyo dhaqangelinta gudiyada kala duwan.     Barnaamijku waxa uu dhigayaa in gudiyadu taageeraan u diyaargarinta dastuurka, gudiga ku meel gaarka ah ee doorashada, iyo guddiga ku meel gaarka ah ee la dagaalanka musuqmaasuqa oo la doonayo in ay ugu yaraan ay ku jiraan afar dumar ah. Barnaamijka tubta looga baxayo ku meel gaarka waxa uu u baahan yahay in labada gudiba ay ka qeyb qaataan qoritaanka dastuurka iyo wax ka bedelidda baarlamanka dawladda dhexe oo la doonayo in ay ku jiraan shan xubnood o ka tirsan xubnaha baarlamaanka.    Tan iyo dhamaadkii sanadka gudiga taageera diyaarinta qoritaanka dastuurka ayaa la sameeyey, iyo ku daritaanka dumarka waxaa loo dhaqan geliyey sidii lagu xusay qodobada.   Gudiga loo sameeyey abuuritaanka barlamaanka cusub ee dawladda dhexe uma hogaansamin waxyaabhihii laga doonayey.

Heshiiskii lagu gaaray shirka Jabuuti waxa uu waajib ka dhigayey in 12 boqolkiiba 550 xubnood ee baarlamanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka ay noqaaan dumar; hase yeeshee, laakiin xubnaha dumarka ah ee baarlamaanku waxa ay ahaayeen 37 ama 6.7 boqolkiiba. Baarlamanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka waxaa ku jira 60 xubnood oo qowmiyadaha laga tirada badan yahay. Golaha wasiirada ee dawladda ku meel gaarka ah ah waxaa ku jiray hal qof oo dumar ah iyo hal rag oo ah dadka laga tirada badan yahay dawladdii uu ra'iisul wasaaraha ka ahaa Maxamed. halka ay golaha wasiirada ku jiraan qof dumar ah iyo laba rag ah oo laga tiro badan yahay dawladda Cabdiwali. Kooxaha bulshada rayidka ah iyo kuwa laga tirada badan yahay waxa ay qeyb ka yihiin "nidaamkii 4.5" kaasoo oo qabiilada laga tiro badan yahay loo qoondeeyay tiro yar iney ku yeeshaan baarlamaanka.

Somaliland laba dumar ah ayaa ku jira aqalka hoose oo ka kooban 82 xubnood iyo hal qof oo dumar ah oo ku jirta golaha guurtida (Aqalka Odayaasha) oo ka kooban 82 xubnood. Dumarku waxa ay dhaqan ahaan ahaayeen kuwo aan lagu darin Guurtida Somaliland "Aqalka sare ee wakiilada" Jagooyinka ka soo baxa golaha Guurtida, inta badan ay sababtu tahay dhimasho, waxaa buuxiya qofka ugu xiga iyada oo la iska dhaxlo. Golaha wasiirada waxaa ku jira laba dumar ah mana ku jiraan kooxaha laga tiro badan yahay. 7dii Sibteembar madaxweynaha Somaliland waxa uu magacaabay guddi sagaal qof ka kooban oo ka tirsan golaha wasiirada iyo baarlamaanka una xilsaaray in ay ka soo talo bixiyaan sidii loo xoojin lahaa ka qeybgalka siyaasadda ee dumarka iyo dadka laga tirada badan yahay. Gudigaasi ma aanay soo saarin warbixin ilaa dhamaadkii sanadka. Gudiga xuquuqda aadanaha ee Somaliland waxa uu gudoomiye u doortay qof haweeney ah.

Puntland marna dumarku xubno kama aanay noqon Golaha Odayaasha. Oday dhaqameedyadii hore, oo rag ahaa, ayaa soo doorta xubnaha barlamanka waxayna taasi fursad yar siineysaa in dumarka lagu soo daro. Hase yeeshee, laba dumar ah ayaa ku jirey baalamaanka 66ka xubnood ah dhamaadkii sanadka. Mid kasta oo ka mid ah shanta gobol ee ay Puntland ka kooban tahay waa in ay baarlamaanka u soo magacawdo qof dumar ah laakiin laba gobol kaliya ayaa arrintaas u hogaansamay. Golaha wasiirada ee ka kooban 18ka wasiir mid kaliya ayaa dumar ka ah. Dadka laga tirada badan yahay xubno kama aha. Sagaalka xubnood ee gudiga doorashada ee Puntland waxaa ku jira qof dumar ah. Madaxweynaha Puntland waxa uu qof dumar ah u magacaabay xafiiska xuquuqda aadanaha

**Qeybta 4aad Musuqmaasuq Saraakiisha iyo Furfurnaanta Dawladda.**

Lama ogsooneyn in sharcigu dhigayo in ciqaab fal dambiyeed ah lagu soo rogo saraakiisha la timaadda musuqmaasuq. Saraakiisha la yimaada musuqmaasuq way ka badbaadaan in sharciga la hor keeno. Ma jirin hay'ad ama ciqaab u degsan sharciga lagu hor keeno oo ka dhisan gobolna oo lagula dagaalamo saraakiisha musuqmaasuqa. Ma jiraan sharciyo dadweynaha awood u siinaya in ay heli karaan ama la socon karaan macluumaadka maaliyadda ee dawladda.

Musuqmaasuq waa mid naafeeyay hay'adaha dawladda dhexe 18kii Luulyo warbixin ay soo saareen Gudiga La Socoshada Soomaaliya iyo Eritariya ee Qaramada Midoobay ayaa dawladda ku meel gaarka ah ku eedeeyey musuqmaasuq gaar ahaan "arrimaha la xiriira ammaanka iyo nabagelyo ku soo celinta koonfurta Soomaaliya." 21kii Febraayo Kooxda Caalamiga ah ee Gurmadka Soomaaliya waxa ay sheegeen in uu aad u kordhay musuqmaasuqa, taaasoo lagu sheegay "in musuqmaasuqu yahay mid ku baahsan maamulka oo dhan aad u qoto dheer kana talowsan xuduudaha Soomaaliya"

Dawladda ku meel gaarka ah waxa ay sameysay cutubka maareynta hantida dadweynaha oo hoos yimaada xafiiska Ra'iisul Wasaarraha sanadkii 2010kii iyadoo madax looga dhigay Cabdirisaaq Fartaag. Bishii Maajo 2010kii faahfaahin waxaa la soo soo saaray warbixin ku saabsan maaliyadda dawladda ku meel gaarka ah ee 2009 iyo 2010 iyo dakhliga dhabta ah ee dawladda soo galay. Warbixintu waxa ay sheegtay in dawladda ku meel gaarka ah ay soo gaartay dakhli gaaraya $75.6 milyan, oo inta badan laga helay dawladaha carabta ee deeqda bixiya iyo Sudan, laakiin waxaa xisaab ahaan la helay meesha ay martay $9.4 milyan oo kaliya. Sidoo kale waxaan la diiwaan gelin dakhli la taaban karo oo dawladda ku meel gaarka ah ka soo galay dekadda, iyo gegida dayuuradaha ee Muqdisho, ganacsiga qaadka, isgaarsiinta waxaa qiyaastii dawladda ku meel gaarka ah dhunsatay $300 milyan sida laga soo xigtay warbixinta. Dawladda ku meel gaarka ah waxa ay warbixinta ku tilmaantay mid laga badbadiyey hadal uu u jeediyey caleemo saarkiisana bishii Luulyo waxa uu ku tilmaamay inuu taxaddi ku sameynayo kuwa isaga ku eedeynaya musuqmaasuq.

Iyadoo laga jawaabayo warbixintan, 120 ka tirsan xubnaha baarlamaanka ayaa saxiixay codsi uu soo bandhigay ku xigeenka afhayeenka bishii Luulyo 25keedii kaasoo lagu weydiistay in la abuuro guddi hoosaad baaritaan ku sameeya hab dhaqanka madaxweyne Sheekh Shariif, ra'iisul wasaarihii hore Maxamed Cabdulaahi Maxamed "Farmaajo" iyo Cumar Cabdirashiid Sharma'arke, wasiirkii hore ee maaliyadda Xuseen Cabdi Xalane iyo Shariif Xasan (afhayeenka baarlamanka ku meel Gaarka ah ee Fedaraalka ee sanadkan). Sida laga soo xigtay nidaamka u degsan baarlamaanka, codsigaas waxa uu helay taageero ku filan in

looga doodo fadhiga barlamaanka. Tan iyo dhamaadkii sanadka baarlamaanku kama doodin waayo waxaa hor istaagay afhayeenka barlamaanka oo diiday in la qabto shirarkii baarlamaanka intii u dhaxeysay Agoosto ilaa Diseembar taasoo ay ugu wacan tahay afhayeenka oo dareen ka qaba in xubnuhu ka doodaan oo isbedel ku sameeyaan barnaamijka Kambaala.

6dii Sibteembar waxa uu barnaamijka Kambala dawladda ku meel gaarka ah ugu yeeray in ay kordhiso hawlaha la xiriira isu Laab furnaanta iyo isla xisaabtanka. Dawladda ku meel gaarka ah waxaa waajib ku aheyd: 1) Inay kordhiso xiriirka wada shaqeynta iyo wadaagista macluumaadka ee u dhaxeeya Soomaaliya iyo hay'adaha horumarinta iyo hay'adaha gargaarka bini'aadminimo inta ka horeysa 19ka Sibteembar; 2) In la dhaqangeliyo xeerar ku jeeda la dagaalanka musuqnaasuqa iyo si xun u adeegsiga hantida dadweynaha inta ka horeysa 19ka Oktoobar; 3) in la abuuro guddi madax banaan oo la dagaalama musuqmaasuqa oo xubno ay ka yihiin "dad aqoon u leh" inta ka horeysa 19ka Nofeembar; 4) in la abuuro gudiyada hawlgalgalka oo xubno ka yihiin "dad aqoon leh" oo warbixin ka soo qora dakhliga dawladda inta ka horeysa 19ka Diseembar. Si loo horumariyo maareynta hantida dadweynaha, dawladda ku meel gaarka ah waxa laga doonayey in la diyaariyo oo la ogolaado miisaaniyad sanadeedka 2011-2012 in aan la gaarin 31ka Diseembar, oo ay dib ugu noqdaan oo dhameystiraan gudiyada u xilsaaran inta ka horeysa Janaayo 2012, oo la diyaariyo barnaamijka horumnarinta qaranka iyo istaraatiijiyadda dib u soo celinta inta ka horeysa Febraayo 2012. Hase yeeshee, ilaa dhamaadkii sanadkan dawladda ku meel gaarka ah ma aanay qaadin wax talaabooyin ah oo lagu dhameystirayo hawlgaladaas.

Tiro ka mid ah wasiirada dawladda ku meel gaarka ah oo la magacaabay 2010kii ayaa UNta warbixin lagu sheegay in ay is daba marin ku sameeyeen waxyaabo la xiriira dal ku galka. Iyadoo taa ka jawaabeysa waxa ay dawladda ku meel gaarka ah ku yaboohday inay baaritaan ku sameyneyso. Hase yeeshee, tan iyo dhamaadkii sanadka ma jirin wax cadeyn ah oo muujinaysa inay taasi dhaceyso.

Sanadkii gudihiisa ciidamada iyo maleeshiyada raacsan dawladda waxa ay sii wadeen in ay lacago baad ah ka qaadayeen tagaasida, basaska, wadayaasha gawaarida xamuulka, oo mararka qaarkood keenta dhimasho.

Ma jirin musuqmaasuq si gaar ah loogu soo edeeyay maamulka Soomaaliland.

Waxaa isa soo taraya wararka sheegaya in Al-Shabaab ay lacago baad ah oo dheeraad ah ay ka qaadaan dadka iyo lacago sako iyo sadaqo ah oo aan la sii

saadaalin karin. Waxa kale oo ay xadeen ama leexsadeen cuntada gargaarka bini'aadminimo.

**Qeybta 5aad Aragtida Dawladda ee ku Jeedda Baaritaanka Caalamiga ah iyo Hay'adaha Samafalka ee Jabinta Sharciyada Xuquuqda Aadanaha.**

Tiro ka mid ah hay'adaha xuquuqda aadanaha ee degaanka iyo kuwa caalamiga ah ee dhulka ka baxsan goobaha ay Al Shabaab gacanta ku hayso, ayaa doonayey in ay baaritaan ku sameeyaan kana soo saaraan warbixin ku saabsan xaaladaha ay ogaadeen ee ku saabsan xuquuqda aadanaha. Hase yeeshee, xaaladaha amaanka ayaa xadiday awoodda ay si xoriyad leh uga hawl geli lahaayeen gobolada dhexe iyo koonfurta ee dalka. Guud ahaan hay'adaha samafalka ee degaanka iyo kuwa caalamiga ah waxa ay ka shaqeeyaan iyada oo aan xayiraado lagu soo rogin Puntland iyo Somaaliland.

Sanadkan gudihiisa weerarada iyo shilalka xadgudka ah ee loo geysto gargaarka bini'aadminimo, diimeed, bulshada rayidka ah iyo shaqaalaha hay'adda samafalka waxa ay keentay dhimasho fara badan. Tusaaale ahaan, 30kii Oktoobar qof hubeysan oo aan la garaneyn ayaa magaalada Galkacyo ku dilay Cabdulqaadir Yasin Jaamac oo ah gudoomiyaha hay'adda horumarinta iyo cilmi baarista ee Puntland. Ilaa dhamaadkii sanadka cidna looma xirin dilka Candulkadir Yaasiin Jaamac. Cabdulqaadir Yaasiin waa qofkii labaad ee xarunta ka tirsan oo la dilo sandkan gudihiisa. 6dii Abriil qof hubeysan oo aan la garaneyn ayaa Garoowe ku dilay madaxii maaliyadda iyo maamulka ee xarunta, Maxamed Yaasiin Ciise "Ilka Case."

Ururka Xuquuqda Aadanaha oo fadhigiisu yahay Mogadishu ee Xarunta Dr. Ismail Ahmed Jimcaale (DIJHRC), xarunta Elman ee Xuquuqda Aadanaha (EPHRC), Shabakadda Nabadda iyo Xuquuqda Aadanaha, Ururka xuquuqda aadanaha ee isha Baydhabo ee gobolada Bay iyo Bakool, Ururka Isbahaysiga Haweenka (COGWO) iyo kuwo kale oo ah kooxaha xuquuqda aadanaha ayaa hawlgal ahaa sanadkan gudihiis. DIJHRC, EPHRC iyo COGWO waxa ay sii wadeen baaritaanka iyo diiwaangelinta jabinta sharciyada xuquuqda aadanaha, daraasad ku samaynta waxyaabaha keenay inay sii socdaan dagaalada Muqdisho iyo la socoshada xaaladda xuquuqda aadanaha. Ururuka Qaranka ee shaqaalaha Warbaahinta (NUSOJ) oo fadhigiisu yahay Mogadishu waxa uu sii waday inuu u doodo xoriyadda warbaahinta dalka oo dhan. Xarunta Cilmi Baarista iyo Wada hadalka

oo fadhigeedu yahay Muqdisho, Xarunta Cilmi Baarista iyo Horumarinta ee Puntland, iyo dhawr ka tirsan ururada haweenka ee urada bulshada rayidka ah ayaa door ka ciyaara dhiirigelinta wada hadalka qabiilada Puntland iyo koonfurta gobolada dhexe.

Mararka qaarkood dawladda ku meel gaarka ah waa ay la shaqeyneysay waxayna ahaayeen kuwa soo bandhigay aragtidooda. Dawladda ku meel gaarka ah waxa ay qaaday talaabooyin la taaban karo oo lagu hor istaagayo caruurta askarta la qorayo ka dib markii ay soo baxeen warbixino ay soo saareen hay'adaha xuquuqda aadanaha in ciidamada dawladda ay ka tirsanaayeen ciidamada dawladda (arag qeybta 1.g.). Hase yeeshee, waxyaabaha la xiriira musuqmaasuqa waxyaabaha ay ka ogaadaan hay'adaha samafalka degaanka iyo kuwa caalamiga ah saraakiisha ka tirsan dawladda ku meel gaarka ah si joogta ayey dawladdu u diidaa. dawladda ku meel gaarka ah oo jawaabaysa warbixin ay soo saartay hay'adda caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha oo ku saabsan maxkamadaha milatariga ah ee dawladda ku meel gaarka ah, waxa ay difaacday xukunka degdegga ah ee lagu qaado eedeysanayaasha iyada oo aan loo ogoleyn qareeno difaaca kuna tilmaantay arrin lama huraan u ah nabadgelyada iyo xilliga dalku ku jiro iyadoo xustay in aan cidina sharciga ka sareyn.

Maamulka Puntland waxa uu diiday eedeymo loo soo jeediyay oo ahaa in aanay ixtiraamin xoriyadda saxaafadda. Waxaana ay dawladdu suxifyiin la xirxiray ku tilmaantay kuwo aan mas'uul aheyn oo waxyaabihii ay ka hadleen khatar ku geliyey nabadgelyada qaranka.

Qaramada Midoobay iyo Ururada kale ee Caalamiga ah: Sanadkan waxa ay dawladda ku meel gaarka ah ka qeyb qaadatay dib u eegis lagu sameeyay xuquuqda aadanaha oo uu sameeyay xafiiska Qaramada Midoobay oo soo saara warbixin sanadle ah. Dawladda ku meel gaarka ah waxa ay ogolaatay 151 talo soo jeedin ah oo ka soo baxay dib u gu noqoshadaas iyadoo qeyb ahaan ogolaatay afar ka mid ah qodobada ka soo haray talo soo jeedinta.

Ururada Xuquuqda Aadanaha ee Dawladda: Si looga hortago xadgudubyada lana xoojiyo ilaalinta xuquuqda aadanaha ee gobolada Puntland iyo Somaliland waxa ay soo sameeyeen gudiyo madax banaan oo u qaabilsan xuquuqda aadanaha. Xubanaha gudiga xuquuqda aadanaha (oo lagu abuuray sharci baarlamaan ee 2009 noqdayna sharci Diseembar 2010kii) ee ogolaaday baarlamaanka bishii Juun. Inkastoo bishii Luulyo la doortay guddi ku meel gaar ah, kheyraadka oo yar iyo gudiga oo aan laheyn waayo aragnimo ku filan ayaa hor istaagay in gudigu noqdo mid taabagal ah oo hawshiisa guta sanadka. Bishii Juun madaxweynaha Puntland

waxa uu qof dumar ah u magacaabay difaaca xuquuqda aadanaha ee gobolka. Hase yeeshee, jagadaasi ma lahayn wax awood ah oo xaga sharciga ah, taasoo ka dhigtay in xilka mas'uulkaasi aanay caddeyn. Ilaa dhamaadkii sanadkan, baarlamaanka Puntland ma aanu ogolaan magacaabistaas.

**Qeybta 6aad Heyb sooca, Xadgudubyada Bulshada Dhuumaaleysi Ku Gelinta Dadka.**

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa xaquuq iyo badbaadinta dadweynaha iyadoo aan loo eegin qowmiyadda, dhalashada, luqadda, jinsiga, ama cidda uu taageersan yahay siyaasad ahaan laakiin ma mamnuucayo noocyada kale ee heyb sooca. Dastuurka Somaliland waxa uu siinayaa xuquuq iyo waajibaad isku mid ah iyada oo aan loo eegin midabka, qabiilka, dhalashada, afka uu ku hadlo, hantida uu heysto, xaaladda, iyo fikradda iyadoo mamnuuceysa heyb sooc ku dhisan qowmiyadda qofka, cidda uu ku xiran yahay, dhalashada iyo halka uu degan yahay. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland waxa uu dhigayaa in muwaadiniintu sharciga u siman yihiin waxa uu mamnuucayaa heyb sooc ku dhisan midabka, diinta, dhalashada, halka uu ka soo jeedo, xaaladda dhaqaalaha, fikradda, siyaasadda uu taageero, luqadda iyo qowmiyadda. Waxa uu dhiirigelinayaa xoriyadda haweenka iyo xaquuqda dhaqan dhaqaale iyo tan siyaasadeed ee aan ka hor imaneyn shareecada Islaamka. Hase yeeshee, xeerarka liddiga ku ah heyb sooca si haboon looma dhaqan gelin gobolka oo dhan.

**Dumarka.**

<u>Kufsiga Iyo Dagaalka Qoyska Dhex Mara</u>: Sharciyo mamnuucaya kufsiga ayaa ka jira Puntland, Somaaliland iyo dhulka ay gacanta ku hayso dawladda ku meel gaarka ah, hase yeeshee, lama dhaqangeliyo. Ma jiraan sharciyo liddi ku ah kufsiga dhex mara dadka isu dhaxa. UNHCR iyo UNICEF waxa ay diiwaangeliyeen kufsi xiriirsan oo dadkii dhibka geystay ay sharciga ka nabadgaleen, gaar ahaan dumarka dadka soo bara kacay oo ka soo tagay guryahooddii una dhashay dadka laga tirada badan yahay. Ciidamada dawladda ku meel gaarka ah iyo xubno ka tirsan maleeshiyada raacsan (arag sidoo kale 1.a, 1.5., and 2.d.). Hab dhaqameed hore ee lagu xalin jirey kufsiga waa mid aan waxba ka soo qaadin xaaladda dhibanaha oo xalka dusha kaga tuura bulshada ama magdhaw lagu siiyo dhibanayaasha kufsiga gorgortan dhex mara xubnaha dhibka geystayaasha iyo qabiilka dhibanayaasha. Dawladda ku meel gaarka ah, Puntland iyo Somaliland waxa ay maxkamad saareen dad lagu soo eedeeyey kufsi sanadkan gudihiisa. Hase yeeshee, qeybta ugu badan, ma jirin qaab dhismeed dhisan oo wax looga qabanaayo kufsiga, si gaar ah dhulka ay dawladdu gacantu ku heyso ee

gobolada koonfurta iyo dhexe. Dhibanayaasha dhibku soo gaaray waxaa ku dhaca heyb sooc ku salaysan "ka badbaadinta" sharciga ee kuwa dhibka geystay. Dumarka iyo gabdhaha soo bara kacay waxa ay si gaar ah ugu nuglaayeen xadgudubka galmoodka. Somaaliland kooxaha rabshada geysta ee kufsigu waxa ay dhibaato ku noqdeen dhulka magaalooyinka ah, gaar ahaan kooxaha rabshadaha geysta ee dhalinyarada iyo ardeyda labka (wiilasha) ah. Qaar badan oo ka mid ah xaaladaha, waxa ay ka dhaceen xaafadda dadka saboolka ahi degan yihiin iyo dadka soo haajirey, qaxootiga soo noqday, dadka soo bara kacay ee dhulka miyiga kuna nool magaalooyinka. Diseembar maamulaha xarunta u gurmadka haweenka dhibka ka soo gaaro xadgudubka galmoodka ayaa sheegay in tirada haweenka da'doodu ka yar tahay 20 ee Hargeysa ay aad u korodhay. Xarunta oo ay xafiiskeedu ku dhex yaal dhismaha isbitaalka Hargeysa ayaa soo sheegtay in ay dhacaan ilaa 10 xaaladood oo kufsi ah bil kasta. Xaaladaha intooda badan lama soo sheego.

Dagaalka qoyska dhex mara ee loo geysto dumarka waxa ay weli tahay dhibaato khatar ah. Ma jiraan sharciyo si gaar ah u wajahaya dagaalka qoyska dhex mara; hase yeeshee, shareecada iyo sharci dhaqameedka waxa ay ka hadleen xal u helista khilaafka dhex mara qoyska. Xadgudubka galmoodka ee xoogga ku dhisan ee ka dhaca guryaha waxaa la soo sheegay inay tahay dhibaato khatar ah oo lagu xiriiriyo heyb sooca guud ee ku dhisan jinsiga qofka. Haweenka dhibaato aanay bulshada kale ula sineyn ayaa ka soo gaaray dagaalada.

29kii Agoosto warbixintii ku saabsaneynd xaaladda xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya, gudigga madaxa banaan ee Qaramada Midoobay waxa ay sheegeen in ay korortay haweenka dhibaatadu ka soo gaarto xadgudubka galmoodka iyadoo intaa ku dartay in dagaalka qoyska dhex mara, rabshadaha galmoodka la socdaan, iyo habdhaqanka dhibaatada leh sida gudniinka gabdhaha oo dhamaan gobolada oo dhan ka jirey.

<u>Gudniinka Gabdhaha:</u> Arag qeybta 6aad, Caruurta

<u>Xadgudka Galmoodka:</u> Ma jirin sharciyo gaar ah oo ku saabsan keydinta macluumaadka ama barnaamijyada dawladda ee la doonayo in wax looga qabto xadgudubyada galmoodka ee sadexda gobol. Hase yeeshee, waxaase loo heystay in ay tahay arrin ku baahsan dhamaan gobolada.

<u>Xaquuqda Ilmo Dhalitaanka</u>: Dhaqanka dalka oo dhan ku baahsan, go'aanka ilmo dhalitaanka waxaa inta badan go'aankeeda gaar u lahaa oo aan lala wadaagin sayga (ninka). Dumarku awood yar ayey leeyihiin in ay si madax banaan go'aan uga

gaaraan iyo go'aan ka gaarista tirada caruurta, kala dheereynta dhalaanka iyo waqtiga ilmaha la dhalayo. Dumarku macluumaad kooban ayey ka ogsoon yihiin, waxyaabaha lagaga hortago uurka. Iyadoo aanu daryeelka caafimaadku aanu ku filneyn, marmar naadir ah ayaa xirfadle tababaran ay goob joog ka noqdaan xilliga dhalmada haweenka ama waxyaabaha aasaaska u ah uureyda iyo daryeelka dhalmada ka dib. Sida laga soo xigtay UNICEF waxaa si aad u daran u kordhay (1,200 ayaa dhinta 100,000 ee nolol ku dhasha) taasoo ay ugu wacan tahay xilliga umusha oo ay nafaqo daro ku dhacdo, gudniinka gabdhaha, iyo daryeel caafimaad oo aan jirin.

<u>Heyb sooc</u> Dumarku ma laha xuquuq la siman tan ragga waxaana si nidaamsan looga dhigay in ay hoos yimaadaan ragga. Guurka hal xaas ka badan waa la ogolaaday. Sharci ahaan gabdhaha iyo dumarku waxa ay dhaxalka ku leeyihiin kala bar hantida ay dhaxlaan wiilasha la dhashay. Sidoo kale, Sida laga soo xigtay shareecada ama hab dhaqameedka degaanka magdhawga dhiiga ee laga bixiyo dhimashada qof dumar ah waa kala bar tirada laga bixin lahaa haddii uu dhibanuhu ahaan lahaa rag.

Dumarka waxa ay noqdeen qeyb dayac badan kaga yimid shaqaalaynta dawladda iyo ganacsatada gaarka ah waayo faraqa xagga waxbarashada u dhaxeeya. Hase yeeshee, midab sooc kalama kulmaan lahaashaha ama maareynta ganacsiga, marka laga reebo dhulka ay gacanta ku hayaan Al-Shabaab. Al-Shabaab waxa ay sheeganeysaa ka qeyb qaadashada haweenka ee arriamaha dhaqaalaha inay tahay arrin aan waafaqsaneyn Islaamka. Ma jirin barnaaijyo dawladeed oo lagula dagaalamayo heyb sooca dhaqaalaha ee haweenka lagu hayo oo ka jiray gobolada.

**Caruurta.**

<u>Diiwaangelinta Dhalashada:</u> Sida uu dhigayo dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxaa lagu qaataa dhalashada iyada oo qofku dhalasho ahaan ka soo jeedo Soomaaliya ama uu aabihii yahay Soomaali ama uu Soomaaliya ku sugan yahay xiligii dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah la saxiixay ee 2004tii. Maqnaanshaha aanay jirin dawlad dhexe, dhalashada lama diiwaan geliyo Puntland, gobolada dhexe iyo koonfurta Soomaaliya. Dastuurka Somaliland waxa uu dhigayaa in dhalashada muwaadinimo la siin karo cid kasta oo asal ahaan ka soo jeedda qof deganaa Soomaaliya 26kii Juun 1960kii ama ka hor. Diiwaan gelinta shahaadada dhalashada si dhab ah ayaa looga dhaqan geliyey cisbitaalada iyo haweenka guryaha ku dhala; hase yeeshee, awoodda dawladda oo kooban, oo ku salaysan dhaqanka miyiga ee nolosha dadka intooda badan, taasoo keentay in aan la diiwaan gelin dhalashooyin badan.

Waxbarashada: Waxbarshada hoosse ma aheyn mid khasab ah, lacag la'aan ah ama dadka wada heli karaan. Tan iyo burburkii qaranka ee 1991, adeegga waxbarashada waxaa qeyb ahaan dib ugu soo noqdeen siyaabo kala duwan oo ay ka mid yihiin hab dhaqameed dugsiyada Quraanka; waxbarashada aasaasiga ah ee dugsiyada waxaa maalgelin ku sameeyey bulshada, dawladaha deeqda bixiya, iyo maamulada Puntland iyo Somaaliland; dugsiyada ay maamulaan hay'ado samofal oo Islaamka ah, iyo tiro dugsiyo gaar ah oo dugsiyo dhexe sare, jaamacado iyo maxadyada tababarka xirfadaha. Meelo badan caruurtu ma dhigtaan dugsiyada aan ka aheyn kuwa quraanka.

Dhulka ay gacanta ku hayso Al-Shabaab, "Jihaadka: ayaa lagu daray manhajka dugsiyada dhexe. Ugu yaraan mar ayaa la soo sheegay in ay Al shabaab ku abaal marisay qori AK-47 arday ku wanaagsanaa wxbarashada. Waxaa jirtay in macalimiinta ajnabiga ah ku soo qulqulayaan si ay wax uga dhigaan dugsiyada Quraanka ee gaarka ah. Dugsiyadan waa kuwo aan qaali ahayn oo bixiya waxbarashada aasaasiga ah; hase yeeshee, waxaa jira warbixino sheegaya in xijaabka gabdhaha yaryar iyo waxyaabo kale hab dhaqanka Islaamka ah oo xag jira laga dhaqangeliyo oo dhaqan ahaan aan ku jirin dhaqanka degaanka.

Xadgudubyada Caruurta: xadgudubyada caruurta iyo kufsiga waxa ay yihiin dhibaatoooyin khatar ah; inkastoo aan la heli karin tirakoob sugan. Ma jiro dadaaal la ogsoon yahay oo maamulada goboladu wadaan oo kula dagaalamayaan dhaqankaan. Caruurta waa dhibanayaasha ugu horeeya rabshadaha bulshada ka dhex dhaca.

Caadooyinka dhaqanka ee dhibaatada leh: gudniinka gabdhaha waxa ay aheyd mid dalka oo dhan ku baahsan. 98 boqolkiiba dumarka iyo gabdhaha waxa ay mareen gudniinka gabdhaha. Intooda badan waxaa ku dhacay fashfash, kaasoo uu ugu sii darnaa gudniinka. Somaaliland lama ogola gudniinka gabdhaha, laakiin sharcigaas lama dhaqangelin. Hay'adaha samafalka ee degaanka iyo kuwa caalamiga ah waxa ay isku dayeen in ay gaarsiiyaan dadweynaha khatarta gudniinka gabdhaha, laakiin ma jirto tirakoob lagu kalsoonaan karo oo lagu cabiro sida barnaamijyadaas loogu guuleystay. 13kii Diseembar madaxweynaha Puntland waxa uu saxiixay sharci mamnuucaya gudniinka fircooniga ah marka laga reebo gudniinka "sunaha ah" kaasoo ah in la gooyo maqaarka sare ee bushimaha ama madaxa kore ee kintirka.

Dhaqanka "caasi walid" taasoo ay waalidiintu ilmahooda geeyan xabsi si ay u edbiyaan iyadoo aanay jirin wax sharci ah oo arrintaas ka degsan. Qaar caruurta ka mid ah ayaa lala xiraa dadka waaweyn.

<u>Guurka caruurta:</u> Guurka caruurta waxa uu ku baahay Soomaaliya oo dhan. Da'da sharciga ah ee guurka waa 15 sano. Hase yeeshee, dhulka miyiga ah waxa ay waalidiintu gabdhahooda u guuriyaan iyagoo aad u yar oo ilaa 12 jir ah. Dhulka ay Al-Shabaab gacanta ku heyso, Al Shabaab waxa ay u guurisay qaar ka mid ah askartooda gabdho yaryar si ay guurka ugu adeegsadaan qoroshada dad cusub.

<u>Caruurta Oo Loo Adeegsado Galmoodka</u>: Gobolada oo dhan waa ka mamnuuc in caruurta ay jirkooda ka ganacsadaan. Dhulka ay maamusho Al-Shabaab, ciqaabtu waa karbaash iyo dhimasho dhagax lagu dilo. Ma jiraan sharciyo rasmi ah oo ka degsan kufsiga oo da'da ugu yar ee qofku galmood ogolaan karo. Filimada lagu soo bandhigo galmoodka caruurta ee lagu sameeyo galmoodka si cad ayaa loo mamnuucay. Caruurta oo loo adeegsado galmoodka waa wax dhaca. Tusaaale ahaan, waxaa laga yaabaa in gabdhaha lagu qasbo inay jirkooda ka ganacsadaan magaalooyinka Garoowe, waxaa kale oo la sheegay haween la geeyay guryaha burcad badeedka oo loo adeegsado galmoodka.

<u>Caruurta Askarta La Qoro</u>: Qorashada iyo adeegsiga caruurta waa dhibaato (fiiri qeybta 1.g).

<u>Caruurta soo bara kacay</u>: Waxaa jirey dad fara badan oo ah dadka soo bara kacay oo ku noolaa ama ka shaqeynayey wadooyinka (arag qeybta 2.d.).

<u>Afduubka Caruurta</u>: Dalku ma sixiixin heshiiskii Hague ee 1980kii ee dhinaca madaniga ah ee afduubka caalamiga ah ee caruurta.

**Yuhuud naceybka.**

Bulsho ka soo jeedda Yuhuudda ma degana dalka mana jiraan warbixino sheegaya falal la xiriira Yuhuud naceyb.

**Dhuumaaleysi ku gelinta dadka.**

Arag *warbixinta dhuumaaleysi ku soo gelinta dadka ee* Wasaaradda Arrimaha Dibedda <u>www.state.gov/j/drl/irf/rpt</u>.

**Dadka Naafada ah.**

Dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ahm dastuurka Somaliland, iyo dastuurka Puntland ee ku meel gaarka ah midna waxa kama qaban takoorka ku salaysan

damiirka ama naafanimada jirka ah , inkastoo ay la hadleen taageerada iyo badbaadada la siiyo dadka naafada ah guud ahaan. Sida uu dhigayo dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah dadwladda ayaa mas'uul ka ah taageertada dadka naafada ah, agoonta, garoobka, dadka soo dagaalamay iyo dadka da'da ah. Sida uu dhigayo dastuurka Somaaliland waxa uu dhigayaa dawladda ayaa mas'uul ka ah daryeelka caafimaadka, horumarinta iyo waxbarashada hooyooyinka, caruurta, naafada, dadka aan haysan daryeel iyo kuwa maskax ahaan naafada ah. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland waxa uu ilaalinayaa una doodayaa xuquuqda agoonta, naafada, iyo cid kasta oo u baahan daryeel xaga sharciga ah. Ma aanay jirin sharciyo dhismayaasha ka dhigaya kuwa dadka naafada ah ay si fudud ku geli karaan.

Maqnaanshaha hay'ado dawladeed oo xog leh, waxba lagama qaban baahida dadka naafada ah. Qaar ka mid hay'adaha samafalka degaanka ee Somaliland ee adeegga u fidiya dadka naafada ah ayaa soo sheegay dhawr dhacdo oo heyb sooc. Iyadoo aanay jirin agabka caafimaadka dadweynaha, ma jiraan hay'ado gaar u ah oo laga heli karo daryeelka iyo waxbarashada cudurada maskaxda. waxa ay ahayd wax mar kasta dhaca in dadka madaxa ka jiran geed lagula xiro silsilad ama guryahooda lagu xiro.

**Dadka laga tirada badan yahay ee Qaranka/Qowmiyadaha/Asalka/Midabka.**

In ka badan 85 boqolkiiba dadka waxa ay wadaagaan asal, diin iyo dhaqan uu saameyn ku yeeshay miyiga. Inta badan dhulka ay degaan kooxaha aan ka soo jeedin qabiilada magaca leh lagama qeyb gelin hay'adaha dawladda waxana loo geystay heyb sooc dhinaca shaqada, dhagaysiga maxkamadda iyo helitaanka adeegga dadweynaha.

Dadka laga tirada badan yahay iyo qabiilada yaryar waxaa ka mid ah jareerta (tan ugu balaaran dadka laga tirada badan yahay), reer hamar, reer baraawe, sawaaxiliga, tumaasha, yaxarta, ma dhibaanka, hawraarsamaha, Muuse dheryo, Fiqi Yacquubka, iyo Gabooyaha Somaaliland. Is guursiga dhex mara dadka laga tirada badan yahay iyo qabiilada safka hore waxaa xadiday dhaqanka. Dadka laga tirada badan yahay ma laha maleeshiyooyin hubeysan taasoo si aan loo sineyn ay ugu dhacdo dilka, jirdilka, kufsiga, afduubka la weydiisto madax furasho, bililiqeysiga, iyada oo aan sharciga la horkeenin maleeshiyooyinka dagaalamaya iyo dadka ka dhashay qabiilada waaweyn ee dhibka geysta Qaar ka mid ah bulshada ayaa ku nool faqri aad u qoto dheer oo dhibaato ay ka soo gaartaa siyaabo kala duwan oo heyb sooc ah iyo diidmo.

**Xadgudubyada bulshada, Heyb Sooca Falal kale Rabshadaha ku Salaysan doorashada jinsiga iyo aqoonsiga jinsiga qofka.**

Ma jirin sharciyo fal dambiyeed ka dhigaya isu galmoodka dadka isku jinsiga ((rag iyo rag ama dumar iyo dumar). Doorashada jinsiga waxaa loo tixgeliyaa inay tahay mowduuc aan laga hadlin oo si furan looga doodin gobol ka mid ah gobolada dalka. Ma jiraan warbixino sheegaya rabshado bulshada ah oo ku salaysan heyb sooc ku dhisan doorashada jinsiga ee qofka.

**Rabshadaha kale ee Bulshada ama Heyb sooca.**

Dadka qaba cudurka Aidska ayaa waxa ay la kulmaan takoorid iyo xadgudubyada bulshada degaanka iyo loo shaqeeyayaasha dhamaan qeybaha kala duwan ee dalka. Warbixin ay soo saartay UNICEF oo ku saabsan Aidska ayaa sheegtay in qofka loo geysto xadgudub jirka ah, iyadoo ay diidaan qoysaskooda, isla markaana ay takoorid kala kulmaan goobta shaqada lagana saaro. Caruurta uu waalidkood qabo cudurka Aidska waxaa dhibaato ka soo gaartaa takoorka, kaasoo caqabad ku noqday dadaalka ka hortagga iyo helitaanka adeeggyada.

## Qeybta 7aad Xuquuqda Shaqaalaha

**Xoriyadda Urur Shaqaale Sameysashda ama Xaqa ay u Leeyihiiin in ay Si Wadajir Ah u Wada Gorgortamaan**

dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah waxa uu shaqaalaha u damaanad qaadayaa in ay abuuri karaan oo xubno ka noqon karaan ururada oo ay shaqo joojin sameyn karaan. Dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland iyo dastuurka Somaliland waxa ay ilaalinayaan xoriyadda ay shaqaaluhu u leeyihiin xoriyadda isu imaatinka, inkastoo kan hore uu xadidayo xaqa ay shaqaaluhu u leeyihiin in ay shaqo joojin sameeyaan kan dambana aan lagu xusin shaqo joojinta. Dastuurka Somaliland waxa uu ogol yahay in ay shaqaaluhu si wadajir ah gorgorton u sameyn karaan; gorgortanka shaqaalaha ee wadajirka loo sameeyo laguma xusin dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah. dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah, dastuurka ku meel gaarka ah ee Puntland iyo dastuurka Somaliland waxba kama qabtaan habka heyb sooca ku dhisan ee kasoo horjeeda ururada shaqaalaha ama ka hor imaadka shaqaalaha ama shaqaalaha shaqada looga saaro iyagoo ka tirsan ururada shaqaalaha

Maamulka dawladda ku meel gaarka ah, Somaliland iyo Puntland guud ahaan way ixtiraamaan xuquuqda uu qofku u leeyahay inuu ka mid noqdo ururada shaqaalaha,

inkastoo ay dhacday in la soo sheegay in ciidamada nabadgelyada Somaliland xabsiga dhigeen gudoomiyaha urur shaqaale. Ma jirin shaqo joojin la soo sheegay sanadkan gudihiisa. Gorgortanka shaqaaluhu si wadajir ah u gorgortamaan ma aha wax si joogta ah u dhaca. Ururada shaqaaluhu waa kuwo ka madax banaan dawladda iyo xisbiyadda siyaasadeed.

7dii Diseembar ciidamada Somaliland waxa ay xireen oo muddo gaaban ay xabsiga ku hayeen Xasan Maxamed Yuusf oo madax ka ah ururka suxufiyiinta ee Somaliland. Xubnaha ururka ayaa markiiba cambaareeyey xariga gudoomiyaha iyo dambiyada lagu soo eedeeyay ee sumcadda looga baabin'inayo iyo go'aanka xeer ilaalinta guud ee joojinta saxaafadda cusub ee la furayo.

Ma jirin warbxino muujinaya heyb sooc laga soo hor jeedo hab dhaqanka shirkadadha loo shaqeeyo. Hase yeeshee, xubnaha ururka shaqaalaha waxaa lala beegsaday rabshado, handadaad iyo xarig aan sabab lahayn iyo xabsi ku heyn ay u geysteen Al-Shabaab gobolada Soomaaliya oo dhan.

**Mamnuucidda xoog ama qasab ugu Shaqeysiga Shaqaalaha.**

Sharciyadii madaniga ee ka horeeeyey 1991kii iyo dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah way mamnuucayaan dhamaan hababka kala duwan ee dadka oo xoog loogu shaqeysto. Hase yeeshee, maamulka dawladda ku meel gaarka ah waxaa ka maqan awoodda dhaqan gelinta ee sharciyada iyadoo dadka oo xoog loogu shaqeysto ay dhacday. Caruurta iyo dadka laga tirada badan yahay ayaa la soo sheegay in loo adeegsado qaadista ganacsiga Qaadka, iyo sidoo kale beeraha iyo xoolo dhaqista. Qorashada iyo adeegsiga caruurta waa dhibaato (fiiri qeybta 1.g). Al-Shabaab waxa kale oo ay ku qasabtay dadka ku dhaqan dhulka ay gacanta ku heyso in ay u guuraan baadiyaha oo ay ka sahqeeyaan beeraha Al Shabaab.

Arag *warbixinta dhuumaaleysi ku soo gelinta dadka ee* Wasaaradda Arrimaha Dibedda www.state.gov/j/drl/irf/rpt.

**Mamnuucidda shaqaaleynta caruurta iyo da'da ugu yar ee Shaqaaleynta.**

Ma cadda haddii ay jiraan da' ugu yar oo dadka shaqada lagu qoro. Sharcigii shaqaalaha ee ka horeeyey 1991kii waxa uu mamnuucayaa caruurta oo laga shaqeysiiyo sharci ahaan da'da shaqada waxa ay aheyd 15 jir, iyada oo da'a kala duwan loo qoray dadka ka shaqeeya goobta haraaga kiimikada ah, iyada oo ku xadidaysa in dadka da'doodu ka yar tahay 18 jir aanay hebeenki ka shaqeyn karin warshadaha, ganacsiga, iyo beeraha marka laga reebo tan ay qoysaskooda

leeyihiin. Hase yeeshee, dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah ee la soo saaray 2004tii in dawladdu abuureyso sharci ku saabsan da'da ugu yar ee shaqada. Sharciga gaarka ah ee Lahaanshaha Gaarka ah waxa uu dhigayaa in caruurta da'doodu ka yar tahay 18 jir haddii ay shaqeynayaan, loo dhiibo shaqooyinka aan dhibaato u geysaneyn caafimaadkooda iyo maskaxdooda.

Caruurta shaqeysa waxa ay aheyd arrin aad u baahsan. Qorashada iyo adeegsiga caruurta waa dhibaato (fiiri qeybta 1.g). Dhalinyarada ayaa si baahsan looga shaqaaleeyaa xoolo dhaqashada, beeraha, adeegga guryaha iyaga oo da'da ahaan aad u yaryar. Caruurta waxa ay qodaan xabaasha iyo iyagoo sigaarka iyo qaadka ku iibiya wadooyinka. UNICEF waxa ay ku qiyaastay 1995 ilaa 2005 in 36 boqolkiiba caruurta da'doodu u dhaxeyso shan ilaa 14 ay shaqeynayeen kuwaas 31 boqolkiiba lab ahaayeen halka 41 boqolkiiba ay dhedig yihiin. Tirada dhabta ah ee caruurta boqolkiiba intaas way ka badan tahay.

Wasiirada shaqada iyo arrimaha bulshada ee dawladda ku meel gaarka ah ayaa mas'uul ka ah dhaqangelinta sharciyada shaqaalaha ee caruurta. Somaliland iyo Puntland, sida ay u kala horeeyaan, Wasaaradda Horrumarinta Qoyska iyo Bulshada iyo wasaaradda Shaqada, Dhalinyarada, iyo Ciyaaraha ayaa mas'uul ka ah dhaqangelinta sharciga. Dhab ahantii, hase yeehee, mid ka mid ahaa wasaaradahaas ma uusan dhaqangelin sharciyadaas.

Waxaad sidoo kale akhrisaa ogolaanshaha Wasaaradda Shaqada *ee hababka ugu xun ee caruurta looga shaqeysiiyo* oo laga heli karo www.dol.gov/ilab/programs/ocft/tda.htm.

## d. Xaaladaha Shaqada ee la Ogolaan karo

Ma jiro sharci u degan oo qeexaya mushaharka ugu yar ee qofku ku shaqeyn karo. Sanadkan gudihiisa sicir bararka ayaa kordhay, waxaana sii socday deganaan la'aanta iyo qodobada kale oo si la taaban karo hoos u dhigay heerka nolosha dalka oo idil.

Inakstoo dastuurka federaalka ee ku meel gaarka ah iyo dastuurka Somaliland ay labaduba ku jiraan qodobo ka hadlaya xaaladaha shaqada ee la ogolaan karo , ma jiro dadaal lagula socdo xaaladaha shaqada.

Somaliland saacadaha shaqada ee todobadka waa 48 saacadood oo shan ama lix maalmood ah. Haddii ay tahay shaqo kala googo'an, saacadaha ugu badan ee shaqaaluhu ay shaqeyn karan waa 10 saacadood maalintii lix maalmood.

Shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin hal maalin oo nasasho ah (inta badan Jimcaha) iyo hal bil oo qofka shaqaalaha ah fasax mushahar la siinayo ah iyo 12 maalmmood oo fasaxyada ciidaha ah. Shaqaaluhu waxa kale oo ay xaq u leeyihiin in magdhaw laga siiyo marka ay shaqeeyaan saacado dheeraad ah maalintii, taasoo la doonayo in aanay ka badan 48 saacadood oo waqti dheeraad ah bishiiba. Ma jiraan wax macluumaad ah oo ku saabsan tirada dadka soo haajiray ee ajnabiga ee ka shaqeeya waddanka.

Dhab ahaantii waxaa la abuuray heerar ku saabsan mushaharka iyo xaaladda shaqada taasoo ku salaysan hab dhaqameed ku dhisan heshiis ku xiran baahida oo ay saameyn ku leeyihiin qabiilka qofka shaqaalaha ah.